**Policy Briefing**

Program Briefing N°74
Nairobi/Brussels, 18 May 2010

International Crisis Group
WORKING TO PREVENT CONFLICT WORLDWIDE

# Islaamiyiinta kala qeybsan ee Somalia

## I. SOO KOOBID

Khilaafka sii xoogeysanaya iyo kala qeybsanaanta kooxeed ee ka dhex jira dhaqdhaqaaqa Islaamiyiinta Somalia ayaa laga cabsi qabaa inay dalka u horseedaan dagaalo culus oo hor leh iyo dhiig badan oo daata. Dagaaladaasi ayaa saameyn weyn oo khatar ah ku yeelan kara gobolka iyo goobo kale oo ka sii fog intaba.

Kala qeybsanaantan ayaa waxay sii hurinaysaa mushkiladda siyaasadeed ee dalka ka jirta iyadoo kooxaha is haya ay ku sii kala fogaanayaan dhanka fikirka, madhabta diimeed iyo kala qeybsanaan qabiil intaba.

Si kastaba aha ahaatee, waxaa xiligan laga yaabaa inay jirto fursad aan sidaa u weyneyn oo ay haystaan qeybaha kala duwan ee siyaasadda Somalia iyo beesha caalamka oo ay kaga faaideystaan kala qeybsanaantan jirta iyo isbedelada dhacay si ay u kasbadaan taageerada maliishiyaadka Soomaalida ee tiradoodu sii kordheyso, kuwaas oo ka xun amaba aan ku faraxsaneyn saameynta weyn ee sii kordheysa ee dagaalyahanada shisheeye iyo xubnaha xag jirka ah ee u tafaxeytey fulinta dano caalami ah.

Kala qeybsanaantani ayaa weligeed jirtey, laakiin waxay hadana ahayd mid qarsoon, waxaana taa ugu wacan qodob kooxahan oo dhan mideynaya oo ahaa joogitaankii ciidamada Ethiopia ee Somalia ee bilowdey tan iyo bishii December 2006da.

Ka bixitaankii ciidamada Ethiopia ee horaantii sannadka 2009ka; dhismaha dowlad wadaag ah oo uu hoggaaminayo mid ka mid ah Islaamiyiinta caanka ah ee magaca ku leh dalka, Sheikh Sharif Sheikh Ahmed; iyo qaadashada amaba meel marinta ku dhaqanka shareecada Islaamka, waxay kooxaha mayalka adag ee dagaalka ku jira, sida Xarakada Mujaahidiinta Al-Shabaab (Dhaqdhaqaaqa Dhalinyarada Al-Shabaab) ku noqotey lama filaan.

Markaa kadib ayaa waxay go’aansadeen inay muujiyaan jiritaankooda, iyagoo meesha ka sii wadey dagaal hubeysan oo ay kaga soo horjeedaan dowladda Madaxweyne Sheikh Shariif.

Waxaa dhaqdhaqaaqa Al-Shabaab ka dhex dilaacey isqabqabsi shakhsiyadeed iyo isku dhac dhinaca aaraada amaba siyaasadda lagu dhaqmayo, waxaana uu khilaafkaasi si weyn u saameeyey koox qabta amaba ayidsan in xal siyaasadeed la gaaro iyo kuwo ayidsan amaba ay ku fog tahay fikradaha kooxda Al Qaacida ee ah in la joogteeyo jihaadka amaba dagaalada caalamiga ee la wado.

Guuldaradii ku habsatey weerarkii xoogganaa ee ay sida wadajirka ah u soo qaadeen kooxaha Al-Shabaab iyo Hizb al-Islam (Xisbiga Islaamiga) ee looga soo horjeedey Dowladda Kumeel Gaarka bishii May sannadkii 2009, taas oo ay ugu wacneyd go’aankii ay qaateen ciidamada Midowga Afrika ee Somalia (AMISOM) oo ahaa inay si adag u difaacaan dowladda, waxay sababeen khilaaf iyo kala qeybsanaan ka dhex dhasha kooxaha Islaamiyiinta.

Khaladaadka ay galeen kooxaha dowladda ku kacsan ee dagaalada wada waxay ahaayeen iyagoo ku guuldareystey inay sii saadaaliyaan amaba ay xisaabta ku darsadaan in ciidamada AMISOM ay talaabooyin qaadi doonaan, iyadoo arinta kale ee muhiimka ah ay tahay inay garan waayeen amaba ay si khaldan u qiyaaseen go’aanka beesha caalamka ee ah inay difaacaan dowladda ku meel gaarka ah.

Soo ifbaxa iyo guulaha milateri ee ay gaartey kooxda dowladda ay isku bahda yihiin ee Ahlu Sunna Wal Jama’a (ASWJ, oo ah koox ku dhaqanta sunnada iyo tabtii Rasuulka) oo ka kooban kooxo ka soo horjeeda xag jirnimada kooxda Al-Shabaab, waxay cadaadis weyn saareen kooxaha xag jirka ah ee dagaalada wada.

Walow kooxda Al-Shabaab ay xajisatey gacan ku haynta magaalada Kismaayo iyo magaalooyin iyo tuulooyin muhiim ah oo ku yaala koonfuurta, kadib markii ay ka awood roonaadeen kooxda ay is hayeen (ee ay hore u mideysnaayeen amaba saaxiib hore oo dhow u ahaayeen) ee Hizb al-Islam, waxay haatan ku jirtaa difaac waxayna dareemeysaa in dagaal lagula jiro amaba uu ku soo fool leeyahay.

Al-Shabaab waxaa qasab ku noqotey inay ka dagaalamaan goobo badan ayna u kala qeybiso ama kukala firdhiso hantideeda iyo dagaalyanadeeda qeybo kala duwan oo dhulka ay dagaalada ka socdaan ah,

kuwaas oo ka fog goobaha ay sida aadka ah ugu xooggan yihiin ee gobollada Jubbooyinka iyo kuwa Shabeelle.

Laakiin ilaa inta ciidamada dowladda KMG ay ka sameeyaan waxqabad la taaban karo oo muhiim ah, lama filayo in faraqa dhanka awoodda ee haatan jira ay wax weyn iska beddeli karaan.

Dhibaatooyinka dhinaca milateriga ee haysta Al-Shabaab waxaa u sii dheer hoos u dhac balaaran oo ku yimid sumcaddii ay ku lahayd bulshada dhexdeeda iyo kalsoonidii lagu qabey intaba.

Iskudeyga iyadoo xoog adeegsaneysa ee Al-Shabaab ku dooneyso inay ku dhaqangeliso Islaamka iyo weliba talaabada ay xagjirnimada ku dheer tahay ee dhaqangelinta Shareecada Islaamka oo ay si arxan darro ah u fasirteen, iyo weliba xaaladda guud ee ku dhisan cabsida iyo cagajugleynta ee ka dhashey nidaamka keli talisnimada ku saleysan, waxay si weyn Al-Shabaab ugu weysey taageerada qeybo badan oo bulshada ka mid ah, xitaa goobo horey loogu aqoonsanaa inay yihiin meelaha ay sida aaadka ah ugu xooogan yihiin kooxaha dagaalada wada ee dowladda ka soo horjeeda.

Walaaca ay bulshada ka qabaan ayaa waxaa kooxdan u sii dheer xaalad lagu dhaqangelinayo xagjirnimada iyo is majaxaabin ka dhex jirta, taas oo sii xoojisey saameynta ay kooxda ku dhex leeyihiin kuwa mayalka adag amaba xagjirka ah ee xiriirka la leh dagaalyahanada shisheeye.

Weerarkii bam ee ismiidaaminta ee Muqdisho ka dhacey bishii December 2009ka, kaas oo ay dad tiradoodu kor u dhaafeyso labaatan oo isugu jirey saraakiil iyo dad rayid ay ku dhinteen, waxaa uu sababey in shacabka ay si carro leh uga jawaabaan amaba ay u dhaleeceeyaan.

Fikirka dad badan ay qabaan ee ah in weerarkaasi amarka lagu fuliyey ay bixiyeen dagaalyahano shisheeye ayaa waxaa uu dhaliyey in si weyn ay xubno kooxda ka tirsan ay iskaga baxaan Al-Shabaab, iyadoo dhanka kalena si weyn u wiiqdey kaalintii ay kooxdan lahayd.

Waxaa dad badani ay dareemayaan in arintani ay si joogto ah u dhaawacdey rajadii siyaasadeed ee kooxda.

Hase yeeshee, Al-Shabaab iyo Xisb al Islaam waa xoogag aan weli tabardhigin. Waxay sii wadaan barnaamjiyadooda ku aadan inay xagjir ka dhigaan Soomaalida dalka ku sugan, kuwa gobolka ku nool iyo dibedda intaba, waxayna khatar ku yihiin dowladda KMG ah iyo dalalka deriska.

Walaaca laga qabaa ee ah in ay xiriir la leeyihiin Al Qaacida waxaa uu taabanaya Mareykanka iyo qaar ka mid ah dalalka waaweyn ee reer galbeedka.

Sidaa darted, Dowladda Federalka Kumeelgaarka ah iyo saaxibadeeda beesha caalamka waxaa la gudboon inay ku dhaqaaqaan talaabooyinkan soo socda:

- Inay fiiro gaar ah u yeeshaan, iskuna dayaan wax ka qabshada, xaaladda sii kordheysa ee fidista fikradaha ku saleysan xagjirnimada ee ay wadaan kooxaha Islaamiyiinta ah;
- Inay sare u qaadaan dagaalka ay ku hananayaan quluubta iyo maskaxda Soomaalida, ooo ay ku jirto inay si cad u qeexaan in dhaqangelinta xagjirnimada ay si weyn salka ugu hayso fikrado aan wax shuqul ah ku lahayn Soomaalida, isla markaana in si si sax ah loo fasiro amaba loo tarjumo kutubada diinta ee muqaddaska ah. Weliba in la sameeyo istraatiijiyad lagu ciribtirayo xagjirnimada dhalinyarada Soomaalida iyo kooxaha Islaamiyiinta Somalia ee qeybsan.
- Inay xoogga saaraan dib u heshiisiinta. Dowladda KMG waa inay ka faaideysataan kala qeybsanaanta ku kala dhex jirta Al-Shabaab iyo Xisb al Islam iyadoo xiriir la sameyneysa shakhsiyaadka aaney xagjirnimada ku fogaan ee labada kooxood kakala tirsan. Mamnuucista lagu soo rogey ururadaasi amaba ku daristooda lagu darey liiska kooxaha argagixisada waa inaysan caqabad ku noqon dadaalka loogu jiro in wadahadal iyo xiriir lala sameeyo shakhsiyaadka iyo kooxaha taageersan amaba ay ka go'an tahay in xal siyaasadeed la gaaro; beesha caalamkana waa inay si weyn ugu tirtirsiisaa dowladda KMG inay qaado talaabooyin dheeri ah oo arintan ku wajahan.

## II. DIB U SOO NOOLEYNTA ISLAAMKA IYO HIRGELINTA FIKRADAHA ISLAAMIYIINTA

Soomaalidu waxay diinta Islaamka ku soo dhaqmayeen in kabadan 1,000 sanno. Waxaa mar walba Somalia ka jirey qeybo ama firqooyin badan oo Islaami ah, iyadoo dugsiyada kala geddisan ee barashada diinta Islaamka iyo madaahiibta ay guud ahaan si nabad ah u wada jireen ilamaa dhowaanahan. Shacabka Soomaalida badankooda waa Shaafici oo qeyb ka ah Muslimiinta Sunniga, iyagoo ku lamaaniya xushmad iyo ixtiraam ay u hayaan kuwa wanaagsan amaba ay Soomaalidu u taqaano awliyo, ayna ku jiraan oo kale aabeyaasha ay ka soo jeedaan inta badan qabaailka Soomaalida. Waxaa dhaqan ahaan caqiidadaasi sal u ahaa tusaalooyinka Suufiyada oo inta badan aan wax dan iyo shuqul ah ka gelin arrimaha siyaasadda.[1]

[1] Marka laga xuso sida Qaadiriyada, Axmadiya iyo Saalixiya. Crisis Group Africa Report N°100, *Somalia's Islamists*

Soo ifbaxa fikirka nidaamka siyaasadda Islaamiga ee casriga ayaa waxaa uu soo shaac baxay sannadaddii 1960damaadka, markaas oo la sameeyey ururkii Wahdat al-Shabaab al-Islamiyya (Midowga Dhalinyarada Islaamka) iyo ururka kale ee al-Jama'a al-Islamiyya (Kooxda Islaamka), waxaana labadoodaba dhiirigeliyey Ururkii Ikhwaanu Muslimiin ee dalka Masar.[2]

Kooxaha kale waxay ahaayeen kuwo uu soo jiitey amaba soo bandhigey fikradaha asal raaca ee Salafiga, iyadoo kadibna kooxaha dagaalyahanada ee qarsoonaa ay ku biireen dagaalkii looga soo horjeedey Midowga Sovieti ee ka jirey dalka Afghanistan.

Dalka Somalia, waxaa olole gaar ah oo lagu dhaqangelinayo Salafiyadda iyo Wahaabiga si xooggan uga wadey dad hanti leh oo Soomaaliyeed iyo kuwo ku sugan dalalka Khaliijka.

## A. SIFEYNTA DIINTA EE WAHAABIYADA IYO SALAFIYADA JIHAADKA KU SALEYSAN

Dalka Sacuudi Caraabiya lacagta faraha badan ee dollarka Mareykanka ee laga heley shidaalka kadib wax soo saarkii shidaal ee dalka ka hanaqaadey sanaddadii 1970aadka - waxay iyana ahayd arin si weyn u dhiirigelisey sare u qaadista Wahaabiyada.[3]

Dugsiyada diinta lagu barto iyo hay'adaha Islaamiga ee samafalka ayaa ka hirgaley dhamaan magaalooyinka waaweyn iyo xitaa goobaha miyiga ah. Kumanaan dhalinyaro Soomaali ah ayaa ku biirey jaamacadaha Sacuudiga – siiba Medina iyo Umm al-Qura – si ay u bartaan culuunta shareecada Wahaabiyada (fiqi) iyo hawlaha dacwada.[4] Waxaa nidaamkaasi waxbarasho barbar socdey mashruuc balaaran oo gargaar ah kaas oo muhimada laga leeyahay ay ahayd in hoos loo dhigo amaba la wiiqo ku tiirsanaanta ay Somalia ku tiirsaneyn Midowgii Soviet iyo in laga hortago saameynta shuuciyadda inay dalka ku sii fido.[5] Shaki la'aan madaxweynihii hore ee Somalia Barre waa u riyaaqey gargaarka dalkiisa loo fidinayo laakiin waxaa si isa soo tareysa uga careysiinayey walaacna ugu hayey agendaha qarsoon ee Islaamiyiinta ay ka lahaayeen mashruucan.[6]

---

[Islaamiyiinta Somalia], 12 December 2005, p. 1. Si aad u hesho faalooyin qoto dheer iyo faahfaahin ku saabsan asalka sare u kaca Islaamka ee bulshada Soomaalida, waxaad eegtaa I.M. Lewsi, I.M. Lewis, *Saints and Somalis: Popular Islam in a Clan-Based Society* [Owliyada iyo Soomaalida: Islaamka oo caan ka dhex noqdey bulsho ku tiirsan qabyaaladda oo uu qorey] (Lawrenceville, 1998).

[2] Roland Marchal, "Islamic political dynamics in the Somali civil war" ama Firfircoonida Islaamka siyaasadda ku dhisan ee dagaalka sokeeye ee Somalia ,ee Alex de Waal (ed.), *Islamism and Its Enemies in the Horn of Africa* [ama Islaamiga iyo cadowgeeda ee Geeska Afrika] (Bloomington, 2004), p. 119.

[3] Wareysi Crisis Group ay khadka telefonka kula yeelatey wadaad caan ah oo Soomaaliyeed oo jooga Toronto, January 2010. Dadka Sacuudiyaanka ah waxaa dhiirigeliyey laba sababood: Mid waa iyagoo ah dad aad diinta ugu dheggan, tan kalena waxay tahay siyaasadda dalka dhanka Juqraafiyadda amaba halka ay dunida kaga taalo. Sare u kaca madhabta Wahaabiga waxaa si dhow loogu xiriiriyaa aqoonsiga Boqortooyada, taariikhdeeda casriga ah iyo fahamka fariinta amaba dacwada la gudbinayo. Wahaabiyada waxaa kaloo loo arkayey sida "difaac dhaqameed asal araac ah", kaas oo awood u leh joojinta fidista shuuciyadda ee dunida Muslimka. Waxaa intaa dheer, inuu jirey tartan u dhexeeyey Masar iyo madhabta Sunniga ee asal raaca oo ay gadaal ka riixeysey Jaamacadda al-Azhar. Talaabo taa la mid ah oo muhiim ah waxay ahayd Kacaankii Islaamiga ee Iiraan ee sannadkii 1979kii, iyadoo madhabtii Shiicada ay bedeshey shuuciyaddii oo markaasi khatar loo arkayey. Si kastaba ha ahaatee, Sacuudiga waxay lumisey awooddii ay mar ku lahayd kooxaha awoodoodu sareyso ee Wahaabiyada ee ay maalgelisey kadib markii ay soo ifbaxeen kooxaha jihaadka ee Salafiga sida Al-Qaacida. Maanta waxaa laf ahaanteeda khatar ku ah koox la magic baxdey al-fi'at al-zala (kooxdii caasiyowdey) – kaas oo ah magac loogu naaneyso Salafiga jihaadka aaminsan.

[4] Mid ka mid ah kuwa ka soo horjeeda amaba naqdiya mashruuca dadka loogu beerayo Wahaabiyada ee sannadadii 1970aadka iyo 1980aadka waxaa uu sheegey in barnaamijka deeqaha waxbarasho markii horeba loogu talagaley in la abuuro dabaqad gaar ah oo Soomaali ah - badankoodana ay yihiin macalimiin Islaami ah iyo wadaado wacdiga jeediya - kuwaas oo doorkoodu uu ahaa inay ka badbadiyaan amaba fidiyaan Wahaabiyada. Waxaa uu intaa raaciyey in sida gaarka ah ee diiradda loo saarey Islaamka, ay ahayd wax laga xumaado, marka loo eego baahida daran ee uu dalka u qabey dhakhaatiirta, injineerada, maamuleyaasha iyo dadka khibrada u leh mihnadaha kale. Wareysi khadka telefonka oo ay qaadey hay'adda Crisis Group, Cairo, November 2009.

[5] Malaayiin dollar ayaa waxaa lagu bixiyey maalgelinta mashaariicda kaabeyaasha kala duwan ee dhaqaalaha , tan ugu muhiimsana waxay ahayd, in dowladda Somalia loo suurageliyo inay hub kaga soo iibsato dalalka Bulgaria, Czechoslovakia iyo kuwo kale oo ku yaaley Bariga Yurub. Gargaarkaasi waxaa uu ahaa mid si aad ah loogu baahnaa in loo adeegsado casriyeynta ciidamada Somalia markii ay u diyaargaroobayeen dagaalkii 1977kii ee gobolka Ogaden , iyadoo lagu doodo in gargaarkani uu ahaa kii ku dhaliyey Madaxweyne Siyaad Barre inuu iska dhegatiro digniintii Moscow ee ahayd inaanu weerarin Ethiopia. Wareysi Crisis Group ay la yeelatey sarkaal sare oo horey uga tirsanaa ciidamada darajadiisuna ay ahayd general, Nairobi, September 2009.

[6] Koox wadaado ah oo lagu soo tababarey dalka Sacuudiga, uuna hoggaaminayo Sheikh Maxamed Axmed ("Garyare"), ayaa waxay bilaabeen olole qarsoon oo lagu abaabulayo dhaqdhaqaaq Islaami ah oo looga soo horjeedo Barre. Sannadkii 1987kii, Garyare iyo saaxibadii waxay dalka Sacuudiga ka aasaaseen ururka Al-Islaax. Ururkaasi waxaa loo oggolaadey inuu xubin ka noqdo ururweynaha Ikhwaanul Muslimiin, waxayna isbaheysi la sameysteen laba urur oo

Waxaa uu si gaar ah uga walaacsanaa koox wadaado ah oo ku xirnaa Sacuudiga kuwaas oo xiligaa bilaabayey inay mimbarada masaajidda ka abaabulaan olole ka dhan ah qaar ka mid ah siyaasadihiisa. Waxaa umuuruhu ay si aad ah u qaraaraadeen horaantii sannadkii 1975, markii Barre uu ka hor yimid wadaado asal raac ah amaba muxaafidiin ahaa, iyagoo isku khilaafey doorka haweenka ku leeyihiin Islaamka.[7] Waxaa taa xigtey hawlgal dhiig ku daatey oo toban ka mid ah wadaadada caanka lagu daldaley.

Dib u dhacyadan la soo deristey ka sokow, Wahaabiyadu waxay sii xawli leh ku kasbatey taageerayaal, isla markaana markii la soo gaarey horaanta 1980aadka waxay noqotey madhabta ugu xooggan dalka.[8] Soo ifbaxeeda iyo inay sare u soo kacdo waxaa gacan ka geystey guuldaradii dagaalkii Ogaden ee ay Ciidamada Qalabka Sida ee Somalia kala kulmeem Ethiopia sannadkii 1977kii, markaas oo riyadii hirgelinta Soomaali weyn ay burburtey.

Waxaa iyana muhiim ah in kalsoonidii shacabka ay ku qabeen fikradaha nidaamka maamulka ee aan ku dhisneyn diinta, casriyeynta iyo horumarka uu dhaawac soo gaarey.

Dhibaatooyinka iyo xanuunka is biirsadey, burburka kalsoonidii horey u jirtey iyo guuldaradii weyneyd ee dhinaca damiirka ayaa waxay abuureen xaalad saykoloojiyadeed oo xooggan, taas oo soo jiidatey mashruuca Islaamiyiinta. Waxaa intaa dheereyd, in dhowr kooxood oo hubeysan ay kordhiyeen weeraro abaabulan oo milateri oo looga gol lahaa in talada looga tuuro dowladda. Burburkii dowladdii Barre sannadkii 199ka, waxaa durba xigey dagaal dhiig badan ku daatey oo u dhexeeyey qabaailada Soomaalida, waxayna sii dhiirigeliyeen baaqa mashruuca Islaamiyiinta. Islaamiyiinta Somalia waxaa sii dhiirigelinayey xaaladda siyaasadeed ee ka jirtey dunida Muslimka.

### 1. Wahaabiyada oo laga dhigayo dariiq toosan

Wahaabiyada waxay badanaa mad-habta kale ee diinta Islaamka u aqoonsan yihiin kuwo diinta ka leexdey "ama caasiyoobey".[9] Gaar ahaan madhabta Suufiyada ee Islaamka ma ahan mid la jecel yahay, taas oo ay ugu wacan tahay iyagoo loo arko "inay caabudaan awliyada" amaba waxyaabo kale oo shirki ah.[10] Inta badan dhaqdhaqaaqyada Salafiga waaa kuwo isku aragti ah, laakiin wahaabiyada ayaa u muuqdey kuwo aad ugu firfircoon dadaalka ay ku doonayaan inay isbedel ku sameeyaan kooxaha ay u yaqaanaan inay yihiin "kuwa diinta ka leexdey" – si ay diinta Islaamka uga dhigaan mid sideedii ku soo noqota amaba la habeeyey.

Wahaabiyada Somalia waxay u sii xuubsiibatey Salafiga Jihaadka ku saleysan, oo ku dhisan fikrado diimeed oo aan ka muuqan wax dulqaad ah, kuna dhaqma dabeecado dagaal doon ah iyo dhaqan sii adkeynaya dagaalka ka

mucaarad ah oo hubeysan oo Soomaali ah – SSDF (Somali Salvation and Democratic Front) iyo USC (United Somali Congress). Isbaheysiga ayaa burburey markii kooxda al-Islaax ay ku guuldareysatey inay ka dhaadhiciso kana joojiso xiriirka dhow ee ay Ethiopia la lahaayeen.

[7] Barre waxaa uu meel fagaare ah ka sheegey in aayadaha Quraanka ee ku saabsan dhaxalka, kuwaas oo u muuqda kuwo ragga u xaglinaya loo baahan yahay in dib loogu noqdo fasiradahooda. Wadaadada waxay ka caroodeen talaabadaasi oo ay u arkayeen kufri ama diintii oo laga baxay. Madaxweyne Barre waxaa uu jeclaa inuu cayaaro siyaasad u janjeerta dhanka bidixda, waxaana uu ku haminayey in loo arko inuu yahay hormuudka u dooda xuquuqda haweenka. Intii uu talada hayey waxaa uu gacan weyn ka geystey sare u qaadista heerka nolosha haweenka ee Somalia marka la barbardhigo hogaamiyeyaashii dalka soo marey, balse waxaa uu su'aal ka keeney "cadaaladda" sharciga quraanka ku xusan ee khuseeya dhaxalka, waxaana uu markaa doonayey iska hor-imaad dhex mara isaga iyo dadka asal raaca ah.

[8] Dugsiyada Quraanka ee Suufiga, kuwaas oo ay ardeydu looxa wax ku qoraan, badanaabana fariista geedaha hoostooda, ma ahayn kuwo la barbardhigi karo dugsiyada sida weyn loo maalgeliyo ee Wahaabiyadda. Qoysaska fukharada ah waxaa soo jiitey dugsiyada Wahaabiyadda, waayo ardeyda waxaa la siinayey cunto, dhar, waxoogaa lacag ah, iyo haddii uu nasiibka u saamaxo, in la siiyo deeq waxbarasho oo ay Sacuudiga wax kaga soo bartaan. Hay'adaha samaflka ee Sacuudiga ayaa maalgeliyey xarumo badan oo lagu xanaaneeyo agoonta, taana waxay sii kordhisey tirada dugsiyada Wahaabiyadda.

[9] Wadaadada Wahaabiga waxay badanaaba daliishadaan xadiis laga soo weriyey Nabi Muxammad oo uu ku sheegey in Muslimiintu ay u qeybsami doonaan 73 madhab amaba firqo, oo mid uun ay jannada geli doonto. *Sunan Dawud, vol. 3, Xadithka nambarkiisu yahay 4580.* Culumada diinta qaarkood waxay aaminsan yihiin in xadiiska uusan sugneyn amaba uu daciif yahay.

[10] Cadaawadda Wahaabiga ay kaga soo horjeedaan in la caabudo owliyada Suufiga waxay ka soo unkatey amaba salka ku haysaa fikirka ku aadan towxiidka amaba in Allah keligii la kor yeelo. Suufiyada waxay aaminsan yihiin in awliyadu ay leeyihiin awoodo ay dadka Allah ugu dhoweeyaan, isla markaana magacyadooda oo la baryaa amaba cibaado lagu dul sameeyaa qubuurahooda ay xoojineyso in Ilaahay loo dhowaado (taqqarrub). Wahaabiyada waxay aaminsan yihiin in talaabada Suufiyada ay tahay dhayalsi ama in la yareysanayo awoodda Ilaahey, isla markaana la caabudayo amaba Ilaah lagu xiriirinayo dad dhintey, taana ay la mid tahay shirki. Wahaabigu waxay kaloo ka soo horjeedaan xuska sannad walba loo sameeyo Nabi Muxammad dhalashadiisa iyagoo daliishanaya isla sababahaa aan soo sheegney. Wahaabigu waxay Mowlidka amaba xuska dhalashada nabiga u arkaan inay tahay bidco amaba wax aan diinta shuqul ku lahayn.

dhex aloosan Islaamiyiinta Somalia.[11] Taana waa sababta xoogagga Al-Shabaab ay ugu dhiiradeen inay burburiyaan qabuuraha Suufiyada.[12]

Islaamiyiinta mayalka adag, sida Hasan Dahir Aweys, ayaa Wahaabiyada u beddeley kacaan awood leh oo diini ah si loogu abaabulo amaba lagu kiciyo Soomaalida isla markaana ay dhaliyaan isbeddel siyaasadeed oo bulshada dhexdeeda ah. Laakiin waxaa jira dhowr sababood oo ku saabsan sababta kooxaha Islaamiyiinta ay ugu arkeen Wahaabiyada inay tahay mid aad u soo jiidata. Tan ugu horeysana waxay tahay astaanteeda isbeddel[13] oo loo adeegsan karo in lagu dhaliyo isbeddelo bulshadeed.Tan labaad waxay tahay Wahaabiyada oo leh dabeecado aan ku tiirsaneyn wadaadada, taas oo hoggaamiyeyaasha Islaamiyiinta Somalia, oo badankooda aan lahayn tababaro rasmi ah oo dhinaca diinta ay u arkaan mid faaido u leh. Tan saddexaad waxay tahay, hirgelinta amaba dhaqangelinta Wahaabiyada waxay hubaal ka dhigeysey in la helo maalgelinta Sacuudiga ha noqoto mid rasmi ah iyo mid aan rasmi ahayn intaba.

Sii looga dhigo Wahaabiyada mid ka dhex muuqata siyaasadda bulshada, in la siiyo fursad ay ku yeelato awood ciidan oo aad u adag, isla markaana lagu daro awoodda iyo u heelanaanta jihaadka, ayaa waxaa lagu lamaaniyey Salafiyada Jihaadka ku saleysan.[14] Tani waxay horaantii 1980aadka horseedey in la aasaaso ururkii al-Itixaad al-Islaami.[15] Inkastoo ururku sida cad uu ahaa mid waddani ah, haddana wuxuu xiriir wanaagsan la yeeshey kooxo maankooda u janjeero dhinaxa jihaadka, isagoo markaa isku arkey inuu qeyb ka yahay hormuudka Islaamka caalamka ee ujeedadiisu ahayd balaarinta awoodda Islaamka ee dunida. Kooxdu waxay xiriir dhow la sameysatey, taageerana u fidisey kooxihii mucaaradka Somalia ee ku sugnaa Ethiopia,[16] laakiin waxaa ugu dambeyntii jebiyey oo u awood sheegtey bartamihii 1990aadka ciidamada Ethiopia.[17]

Jabkii ku dhacey ururka Al-Itixaad ma wiiqin amaba hoos uma dhigin saameynta xooggan ee Salafiga jihaadka ku saleysan ay ku lahaayeen Muslimiinta mayalka adag ee Somalia. Sidey doontaba ha noqotee, waxaa uu sii xoojiyey barnaamjika dadka looga dhigayo inay xagjir noqdaan, waxaana laga yaabaa in dad badan oo xaaladda la socda ay aaminsan yihiin inay dhalisey in dadka qaarkood ay qaataan fikradaha xagjirnimada diineed tan ugu daran: Jihaadiga Takfiirka ku saleysan.[18]

## 2. Soo ifbixii Jihaadiga Takfiirka

Mabda'a udub dhexaadka u ah Takfiirta waxaa uu qabaa amaba ku doodaa in bulshada Muslimiinta ee maanta jooga ay ku dhaceen xaalad kufri ah (ridoobid ama diin ka tegis).

Tani waa halkii ugu sareysey ee uu gaaro mabda'a Salafiga oo aaminsan in Musliiminta maanta joogaa ay ku jiraan xaalad jaahili ah. (jaahiliyaddii jirtey Islaamka ka hor).

Fikradaha Takfiirta waxay raad taariikheed oo dheer ku leeyihiin Somalia, iyagoo ahaa kuwo dahsoon oo si hoose ugu dhex jira aydolojiyadda balaaran ee Salafiga Jihaadka ku saleysan, kuwaas oo ay hormuud ka yihiin dadka mayalka adag kadib markii uu burburey maamulkii

[11] Wahaabiyada waxay ka horeysey Salafiyada casriga ah ee Rashid Rida, Jamal al-Din al-Afghani iyo Hassan al-Banna. Labadaa firqo waxay wadaagaan waxyaabo badan, isla markaana qeybo badan oo dunida Muslimka ka mid ah way adag tahay in la kala saaro amaba la kala garto. Waxay wadaagaan aragti mayal adag oo aad u arxan daran, quraanka iyo xadiiska oo si sax ah loo tarjumo iyo dulqaad la'aan ay u muujiyaan muslimiinta ka tirsan madhabta kale. Salafiyada jihaadka ku saleysan ee Somalia waxaa uu ka dhashey isku darka Wahaabiyada iyo Salafiyada casriga ah. Si aad u hesho faalooyin qoto dheer oo ku saabsan Wahaabiyada iyo Salafiga jihaadka ku saleysan, waxaad eegtaa warbixinta Crisis Group Africa Report Nº100, *Somalia's Islamists*, 12 December 2005; and Middle East/North Africa Report Nº37, *Understanding Islamism* [Fahamka Islaaminimada], 2 March 2005.

[12] Burburinta goobaha diiniga waxay ku bilaabatey markii la soo faagey qubuurihii gumeysiga Talyaaniga, talaabadaas oo uu qaadey Aadan Xaashi Faarax Ceyrow iyo maleeshiyadiisa sannadkii 2005. Tani waxay u sii xuubsiibatey olole dhowaan la qaadey oo lagu burburinayo qubuuraha Suufiga.

[13] Wahaabiyadu waxay ahayd nidaam diinta dib u habeyn loogu sameynayo, oo uu dhidibada u taagey Muhammad Ibn Abd-al-Wahhab, loogana gol lahaa "in lagu nadiifiyo" Iimaanka Islaamka loogana sifeeyo dhamaanba hababka kala duwan ee ku jira diinta, gaar ahaan saameynta fikradaha Hellenic (Giriigii hore), filosofiyadda bii'ada ee dersidda halka nooleyaasha ay ka soo jeedaan iyo culuunta diimaha ee Hindia iyo Persia (Iiraan). Sidaa darted waa isku day la doonayo in dib loogu hanto laguna sugo dhaqangelinta "diin sax" oo Iimaanka Islaamka ku saleysan oo ka dhan ah diin ka leexashada Suufiyada.

[14] Nidaam kaa la mid ah waxaa uu ka socdey qeybo badan oo dunida muslimka ka mid ah, gaar ahaan Waqooyiga Africa, Sacuudi Caraabiya, Yemen iyo Afghanistan. Eeg ibid.

[15] Warbixinta Crisis Group Report, *Somalia's Islamists*, op. cit., p. 3.

[16] Ururadani waxaa ka mid ahaa al-Itihaad al-Islaami ee Soomaali Galbeed (the Islamic Union of Western Somalia) iyo Ogaden National Liberation Front. Intii u dhexeysey 1995-1996, ururka Al-Itixaad waxaa uu ku lug yeeshey weeraro argagixiso oo ka dhacey Dirir Dhabe iyo Addis Ababa. Ibid, pp. 4-9.

[17] Bishii August sannadkii 1996 iyo mar kale bishii January, sannadkii 1997, ciidamada Ethiopia waxay ka talaabeen xadka iyagoo gudaha u galey Somalia si ay u weeraraan una burburiyaan saldhigyada ururka Al-Itixaad. Ibid, p. 9.

[18] Wareysi ay qaadey hay'adda Crisis Group, Nairobi, January 2010.

Siyaad Barre.[19] Tan iyo bilowgii 2009ka, kooxda mayalka adag ee ka tirsan Salafiyada jihaadka ku saleysan waxay dib u soo nooleeyeen isla markaana dhaqangeliyeen fikradaha Takfiiriga dagaalka aydolojiyadeed ee ay kala soo horjeedeen Sheikh Shariif iyo dowladiisa. Waxay fikradahaani u heystaan kuwo "wax lagu sifeynayo" ee lagu gaarayo talaabada xigta ee dhaqangelinta aydolojiyadda Salafiga jihaadka ku saleysan, taasina ay dunida u qeybin doonto laba dhinac oo sahlan, si wanaagsana u muuqda: Dar al-harb (Daartii dagaalka) iyo Dar al-Islam (Daartii Islaamka).

Marka laga hadlayo fikradaha Takfiirta, doorka saxda ah ee la xiriira nolosha iyo mihnadda amaba shaqada "muminka dhabta ah" waxaa uu yahay in dagaal joogto ah oo jihaad ah uu qaado si dib loogu abuuro bulsho kaamil ah oo Dar al-Islam ku dhisan. Ma jiraan darajooyin ay adag tahay in sahlan loo qeexo oo la xiriira iimaanka Islaamka, sida ay wada rumeysan yihiin Muslimiinta Sunniga iyo kuwa Shiicada. Qofku waxaa uu noqon karaa mu'min dhab ah amaba murtad diinta ka riddoobey.

Mowqif daciiif ah, iyadoo gorgortan lala galo iyo cadowga oo daacad loo noqdaa waa dembiyo waaweyn oo cadeyn u ah in qofku riddoobey, kuwaas oo ciqaabtoodu ay dil tahay. Takfiirtu waxay Madaxweyne Shariif iyo Dowladda Federalka KMG u haystaan inay dembiyadan waaweyn geysteen.

## III. ISLAAMIYIINTA QEYBSAN

Inkastoo ay Somalia ka jiraan dhinacyo kala duwan oo diinta Islaamka isku khilaafsan, ayaa haddana xurgufta ugu balaaran waxay u dhexeysaa kooxaha Salafiyiinta, gaar ahaan Al-Shabaab iyo Hizb al-Islam, iyo kooxaha Suufiyada oo dhaqan ahaan dalka uga jirey, kuwaas oo haatan isu abaabuley magaca Ahlu Sunnah Wal Jama'a (ASWJ).[20] Soo ifbaxa iyo baaqa kooxaha Islaamiyiinta waxaa uu la xiriiraa iyadoo la rumeysnaa inay ka wanaagsanaan karaan amaba ay soo afjari karaan kala jabka sida weyn u aafeeyey bulshada Somalia, laakiin wallow ay ka muuqato isku duubni dusha sare uun ah, inta badan kooxaha islaamiyiinta waxay u kala qeybsan yihiin qaab aydaloojiyadeed iyo mid qabiil intaba.[21] Bilowgii, Al-Shabaab iyo Hizb al-Islam waxay wadaageen aragti mid ah iyo ku dhaqanka shareecada,[22] laakiin hadana waxay ku kala qeybsan yihiin laba arimood oo muhiim ah, kuwaas oo kala ah mabda'a Soomaali weyn iyo adeegsiga qabiilada ee dhanka siyaasadda. ASWJ wuxuu u muuqdaa urur ka dulqaad badan dhinaca kala duwanaanshaha fikirka, hadana waxay si qota dheer ugu kala qeybsan yihiin qabiil amaba reer reer.[23]

Waxaa xitaa aad u adag in warbixin si wanaagsan loo fahmi karo laga qoro kooxaha Islaamiyiinta ee Somalia, sababtuna waxay tahay waxaanba jirin qoraalo rasmi ah oo laga qorey siyaasadahooda amaba mabda'a ay ku dhaqmayaan, aydaloojiyadooda amaba qaab dhismeedka ururadooda.[24] Inkastoo dhowaan uu soo wajahay

---

[19] Wareysi ay qaadey Crisis Group, Roland Marchal, khabiir, Nairobi, February 2010. Amiirka Al-Shabaab, Axmed Cabdi Godane, waxaa haatan la rumeysan yahay inuu hadda yahay Al-Shabaab ninka ugu caansan ee taageera amaba fidiya aydolojiyadda Takfiiriga ee ku saleysan jihaadka. Fikradaha Takfiirta waxay leeyihiin taariikh dheer , waxaana marka dib loogu noqdo ay ka soo jeedaan Khawaarijta, oo ah koox mayal adag oo soo ifbaxdey qarnigii 7aad, taas oo dagaal kharaar kala hor timid Khaliifkii afraad ee Muslimiinta, ahaana kii ugu dambeeyey "Khulafaul Raashiduunka" Cali Bin Abii Taalib, oo ay dileen sannadkii 661. Dhaqdhaqaaqa asalka ah ee al-Takfir wal-Hijra waxaa lagu unkey dalka Masar, iyadoo uu hoggaanka u hayey Shukri Mustafa, oo xubin ka ahaa ururkii Ikhwaanul Muslimiin, kaas fikradihiisa isbeddel doonka ah kala soo dhex baxay khibradii qoraalada Sayyid Qutb iyo weliba khibrad uu ka kasbadey intii uu ku jirey xabsiyada dalka Masar. Dhaqdhaqaaqa asalka ah ee al-Takfir wal-Hijra waxaa uu masuul ka ahaa afduubkii iyo dilkii loo geystey wasiir ka tirsanaa dowladda. Intaa kadib Shukri Mustafa waa la diley, laakiin maliishiyo taabacsan fikradaha Takfiiriga, oo uu ku jiro ninka ku xiga Osama bin Laden, Ayman al-Zawahiri, waxay tan iyo waagaa ku lug yeesheen khalaalase iyo rabshado xagjirnimo ah. Faahfaahin dheeri ah, eeg Crisis Group Middle East and North Africa Briefing N°13, *Islamism in North Africa II: Egypt's Opportunity* [Fursadda Masar], 20 April 2004, pp. 3-4; and Crisis Group Report, *Somalia's Islamists*, op. cit., p. 12.

[20] Magaca Ahlu Sunnah Wal Jama'a waxaa uu ka soo jeedaa ereyo ay soo curiyeen culumada Ahlu Sunniga si ay isaga soocaan Muslimiinta madhabta Shiicada. ASWJ waxay ku doodayaan in Wahaabiyiinta, gaar ahaan Al-Shabaab, inaaney qeyb ka ahayn afarta mad-hab ee waaweyn ee Islaamka asalka ah.

[21] Eeg, tusaala ahaan, Crisis Group Africa Report N°147, *Somalia: To Move Beyond the Failed State*, 23 December 2008.

[22] Ciqaabaha naxariista daran sida adimada jirka oo la gooyo, in qofka dhagax lagu dilo iyo karbaashka waxaa si caadi ah looga fuliyaa dhamaan goobaha ay ka taliyaan Hizb al-Islam iyo Al-Shabaab. Haweenka waxaa iyana khasab loogaga dhigey inay xirtaan xijaabka iyo niqaabka wejiga lagu daboolo.

[23] ASWJ si cad uma muujin mowqifkeeda ku aadan mabda'a Soomaali weyn, waxayna xiriir dhow la yeelatey Ethiopia - si la mid ah kooxaha kale ee dalka ka jira, iyadoo dooneysa inay mowqifkeeda ka dhigto mid aan la hubin.

[24] Talaabadan waa mid qorsheysan oo ku talogal ah. Kooxaha Islaamiyiinta Somalia - gaar ahaan al-Ittihaad al-Islami iyo Midowga Maxkamadaha Islaamiga waxay caadeysteen inay ka fogaadaan in laga doodo kala tafaraaruqa la xiriira diinta iyo fikirka. Waxaa loo haystaa in arimahaasi ay horseedi karaan kala qeysanaan ku timaada dhaqdhaqaaqa Islaamiyiinta, amaba inay huriyaan dagaalo ku saleysan mad-hab amaba kooxo diimeed, isla markaana wiiqi kara awoodda milateri iyo tan siyaasadeed ee dhaqdhaqaaqa. Hase yeeshee, runtu waxay tahay in had iyo

iskudhacyo iyo kala qeybsanaan, hadana ururada Islaamiyiinta Somalia waa kuwo sirtooda si weyn u xafida oo ay adag tahay in ay dibedda u soo baxdo. Mid ka mid ah waxyaabaha muuqda waxaa ka mid ah iyagoo si xad dhaaf ah muhiimad u siiya shakhsiyaadka.

Fiiro gaar ah lama siin fikradaha, ujeedooyinka iyo culuunta diimeed ee suurageliya jiritaanka ururadani, isla markaana huriya siyaasadahooda gaarka ahaaneed ee aan gorgortanka ku dhisneyn. Laakiin fahamka aydolojiyadeed iyo midka diimeed ee salka u ah madax adeyga kooxahan Islaamiyiinta, kuwaas oo sabab u ah dagaalka dhexdooda ka aloosan waxaa uu muhiim u yahay hanaanka nabad raadinta.

Dadaal kasta oo dhab ah oo ay Dowladda Federalka KMG ku dooneyso inay wax kaga qabato dagaalada loogaga soo horjeedo isla markaana ay kala soo dhax baxayso dad ka tirsan mucaaradka oo wadahadal nabadeed diyaar u ah waa inay ku saleysanaataa fahamkaasi, hadiiba la doonayo in horumar amaba guul laga gaaro dadaaladaasi.[25]

Mid ka mid ah waxyaabaha lagu kala qeybsan yahay waxay tahay waddaniyadda Somalia. Labada hoggaamiye ee Hizb al-Islam leedahay, Sheikh Hasan Dahir Aweys iyo Sheikh Hasan Abdullahi Hirsi, "Hasan Turki", waa dad waddaniyiin ah isla markaana si weyn ugu ololeeya in la abuuro Soomaali weyn, oo hal dowlad la isugu keenayo dhamaan gobollada ay Soomaalidu degto.[26] Al-Shabaab waxay ajendaha ay leedahay u aragtaa mid ka balaaran gobolada ay Soomaalidu degto ee Geeska Afrika ku yaala.

Waxay ujeeddada Al-Shabaab tahay dhismaha maamul caalami ah oo Islaami ah oo dib khaliifyada Islaamiga loogu soo celinayo, taas oo aan lahayn xuduudo juqraafiyadeed oo cayiman.[27] Xubnaha mayalka adag ee ku jira ururka waxay ereyga waddaniyadda u arkaan mid laga dhaxley gumeysiga isla markaana ay qeyb ka tahay dhibaatada taagan. Waxay ku doodayaan in waddaniyada casriga ah iyo fikradda ku saleysan dal iyo dowlad ay yihiin kuwo shisheeye oo looga gol leeyahay in lagu kala qeybiyo bulshada Islaamka ee caalamka ku nool.

Arinta kale ee kala qeybsanaanta keeneysaa waxay tahay aragtida laga qabo qabaailka. Ururka Hizb al-Islam waxaa uu si weyn u taageersan yahay uguna dhaqmaa nidaamka qabiilka ku saleysan, oo uu ururku isku dayayo inuu ku gaaro ujeedooyinkiisa istraatiijiyadeed.

Afarta xubnood ee ugu weyn ururka Hizb al-Islam waxaa lagu xushey qaab la doonayo in lagu hirgeliyo nidaam qabaailka awoodda loogu qeybiyey si siman.[28] Aweys iyo Turki labadaba waxay muddo ka faaideysanayeen xiriir wanaagsan oo ay la lahaayeen odayaasha dhaqanka ee qabaailadooda – ee Ceyr iyo Ogaadeen. Da'adooda oo weyn iyo muddada dheer ee ay ku soo jireen siyaasadda waxay u saamaxdey inay xiriir wanaagsan la yeeshaan odayaasha qabaailka taana ay u suurageliso inay helaan taageerada qabiiladooda. Dhab ahaantii, go'aankii qabaailka ku dhaqan Muqdisho iyo koonfuurta Somalia ku gaareen inay ku taageeraan Midowga Maxkamadaha Islaamiga dagaalkii ay kula jireen dagaal oogeyaashii Muqdisho sannadkii 2006 iyo guushii weyneyd ee ay ciidamada maxkamadaha kaga adkaadeen dagaal oogeyaasha waxaa sal u ahaa awooddii maxkamadaha ee ay u lahaayeen inay wada shaqeeyaan odayaasha qabaailka. Maalmihii farxadda iyo reynreynta ee Maxkamadaha Islaamiga ay haysteen ku dhowaad taageerada caalamka oo dhan, Aweys iyo asxaabtiisa looma arkeyn oo qura sida hoggaamiyeyaal macquul ah oo qaran, balse waxaa xitaa loo arkayey inay hormuud muhiim ah u yihiin danaha qabaailada ay ka soo jeedaan.[29]

---

jeer uu jirey hir xooggan oo lagu caadiyeynayo dalka oo dhanna looga hirgelinayo Wahaabiyada.

[25] Baahida loo qabo in faham qota dheer loo yeesho heerka ay gaarsiisan tahay aydolojiyadda kooxaha Islaamiyiinta ma ahan inay iyada keliya ku filan tahay si loo gaaro hadafyada la higsanayo. Kooxahani horumar ayay sameynayaan waxayna sameynayaan isbeddelo xili lagu guda jiro xaaladda cakiran ee siyaasadeed ee dalka ka jirta, oo ah kooxaha isbaheysanaya ay mar walba meel cusub u guurayaan amaba sameysanayaan xulafeysi cusub. Eeg Crisis Group Report, *Somalia's Islamists*, op. cit., p. 2.

[26] Waxaa jira gobolo balaaran oo ay Soomaalidu deggan yihiin oo ku yaala Ethiopia iyo Kenya; In badan oo ka mid ah dadka deggan Djibouti oo horey Faransiisku u gumeysan jirey iyaguna waa Somali.

[27] Raadiyowga Al-Shabaab ku leedahay koonfuurta Somalia waxaa loo yaqaanaa Radio Andalus – waxaana magacaasi uu dib u xusuusinaya boqortooyadii Islaamiga ee ka talin jirtey koonfuurta dalka Spain ee loo yiqiiney Andalusia, xiligaas oo dad badan u haystaan inay ahayd waqti dahabi ah oo Islaamka soo mara.

[28] Marka laga soo tago afarta xubnood ee ugu sareysa kooxda Xizb al Islam, xubnaha kale ee ka soo jeeda qabaailka waaweyn waxaa ka mid ah Dr. Omar Iman Abubakar (Baadi Cadde); Muxammad Mire (Majeerteen); Xasan Mahdi (Reer Aw-Xasan ); Abdiqadir Komandos (Gaadsan, Dir); iyo Cabdullahi Khatab (Reer Aw-Hasan).

[29] Lama hayo cadeymo muujinaya in Hizb al-Islam ay taageereyso fikir ku saleysan "in wax walba lagu dabaqo mabda'a Islaamiga" walow berigii ay jireen Maxkamadaha Islaamiga, in taasi ay ahayd jihadii ay wax walba ku socdeen. Muqdisho waxaa lagu maamulayey sida maamul goboleed gaar ah, waxaana nidaamkaasi maamul haddii uu guuleysto uu qorshuhu ahaa in laga dhaqangeliyo gobolo ama magaalooyin kale oo dalka ku yaala. Hase yeeshee waxaa xusid mudan inaan nidaamkaasi lagu qaldin habka maamul goboleedyada u shaqeeyaan. Qeybaha kala duwan ee Islaamiyiinta ma taageersana hanaanka maamul goboleedyada waxayna u arkaan

Aragtida dhanka qabiilka ee kooxda Al-Shabaab waa kuwo isku jira. Xubnaha mayalka adag ee ku jira kooxda waxay fikrad ahaan uga soo horjeedaan ku dhaqanka qabiilka, waxayna talaabo kasta oo wax lagu saleynayo qabiilka u arkaan inay ka markhaati kaceyso diinta Islaamka oo aan si kaamil ah loogu dhaqmin. Xubnaha aan sida aadka ah ugu dhaqmin xagjirnimada waxay mararka qaarkood adeegsadaan nidaamka qabiilka si ay ugu gaaraan ujeedooyinkooda muddada gaaban, balse waxay xubnaha kale kala siman yihiin inaan sinaba loogu milmin amaba aan laga qeyb qaadan siyaasadda qabiilka ku saleysan ee Somalia.

## A. Al-Shabaab

Al-Shabaab (Dhalinyarada) waxay soo shaac baxeen waqtigii uu soo ifbaxey Midowga Maxkamadaha Islaamiga.[30] Kadib duulaankii Ethiopia ee lagu afgamebiyey Midowga Maxkamadaha Islaamiga, kooxda Al-Shabaab waxay si xooggan u fulisey olole milateri, siyaasadeed iyo propaganda intaba kaas oo ay uga gol lahayd inay dib gacanta ugu dhigto koonfuurta Somalia. Waxay si weyn u qoratey dhalinyaro xagjir ah, iyadoo halganka amaba dagaalka ay kula jirto kooxaha ka soo horjeeda u aragta mid muhiim ah marka loo eego dhanka aydolojiyadda amaba fikirka.[31] Bilowgii, Al-Shabaab waxay ahayd shabakad aan si weyn isugu xirneyn oo ka kooban kooxo Islaami ah oo ka so horjeedey duulaankii Ethiopia ee Somalia, waxayna dhowrkii sanno ee la soo dhaafey ay kooxdu noqotey mid balaaran marba marka ka sii dambeysana muujineysa ku dhaqanka xagjirnimada. Waxaa jira laba sababood oo waaweyn, mid waa siyaasad, tan kalene mid aydolojiyadeed amaba fikir ku saleysan.

### 1. Jawaabta laga bixiyey doorashadii Sheikh Shariif

Isbeddelkii lama filaanka ahaa ee siyaasadeed ee dhacey horaantii 2009 waxaa uu sababey hirar naxdin leh oo gilgiley Al-Shabaab. Hoggaamiye Islaami ah, Sheikh Sharif Sheikh Ahmed, ayaa loo doortey inuu noqdo madaxweynaha cusub ee Dowladda Federalka KMG ee Somalia oo la balaariyey - waxaana dowladaasi muddo gaaban loogu yeerey magaca Dowlad Midnimo Qaran - 31kii January. Ka bixitaankii Somalia ee ciidamada Ethiopia oo qeyb qeyb ahaa kaas oo bilowdey bishii December 2008 ayaa la dhameystirey horaantii bishii February 2009. Muddo gaaban kadib dowladda cusub ayaa ku dhawaaqdey sida ay uga go'an tahay inay dalka ka hirgeliso ku dhaqanka Shareecada Islaamka. Waxaa bilowdey wadahadalo hoose oo la doonayey in lagu dhiirigeliyo qaar ka mid ah hoggaamiyeyaasha muhiimka ah ee Al-Shabaab si ay uga haraan dagaalka, isla markaana ugu soo biiraan dowladda.

Xawliga, xaddiga iyo saameynta la filan karey ee isbedeladani wateen ayaa waxay Al-Shabaab iyo kooxaha kale ee mucaaradka ay muddo kooban ka dhigeen kuwo lumiyey awooddii ay lahaayeen, waxayna taa ku qasabtey inay deg deg ugu dhaqaaqaan si ay jawaab waafi ah uga bixiyaan xaaladda asiibtey. Wadahadaladooda sida aadka loo diyaariyey iyo hadalada ay isticmaalayeen, waxay si weyn ugu qotomeen waxa looga soo horjeedey amaba loo diidanaa, iyo in dagaal hubeysan la qaado, ay u muuqaneyso baaqa meel cidla ah ku dhacaya, hadiiba waxa ay sheegayaan dhamaan aaney Soomaalidu badankeed ugu muuqan inay yihiin munaafaqnimo. Waxaa markan laga dhowrayey inay caddeeyaan mowqifkooda, iyo weliba tan ugu muhiimsan, sida mashruucooda hirgelinta fikradaha Islaamiga ee dalka uga fiican yahay amaba kaga duwan yahay kan dowladda cusub ee Federalka KMG.

inay tahay furaha kala qeybsanaan dheeri ah oo ka dhex dhalanaya bulshada Soomaalida. Xitaa xubnaha uu mowqifkoodu dhexdhexaadka yahay ee ku jira dowladda Sheikh Shariif ma ahan kuwo la dhacsan hirgelinta nidaamka federaalka, taasina waxay cadeyn u tahay cadaawadda ay Puntland u hayso Dowladda Federalka KMG.

[30] Waxaa jira aragtiyo is-khilaafsan oo ku saabsan xiliga rasmi ahaan la aasaasey ururka Al-Shabaab. Waxaa jira fikir ah in kooxdan uu sannadkii 1998da sameeyey hoggaamiyaha Islaamiyiinta, Sheikh Xasan Daahir Aweys, isagoo ugu talagaley inay kooxdu noqoto garabka milateri ee Maxkamadaha Islaamiga. Aragtida kale ayaa waxay tahay in la sameeyey bartamaha sannadkii 2006, uuna dhisey nin si weyn ugu tiirsanaa Aweys oo ah Ceyrow, waxaana loogu talagaley inay noqoto unug gaar ah oo ka tirsan Maxkamadaha Islaamiga, fuliyana "hawlgalo amaba dagaal aan sharciyeysneyn" isla markaana horsed u noqda dagaalka loogala soo horjeedo ciidamada Ethiopia iyo kuwa Soomaalida.

[31] Al-Shabaab waxay si gaar ah u adeegsaneysey qalabka warbaahinta si ay ugu fidiso dacaayado ku saleysan dagaalka. Website-yo kala duwan oo Soomaaliyeed oo janjeera dhanka jihaadka, oo intooda badan ay ka hawlgalaan Yurub iyo Waqooyiga Mareykanka, ayaa waxay buunbuuniyeen aydolojiyada amaba fikirka dagaalka ee kooxda Al-Shabaab, oo aaminsan in muslimiinta "saxda ah " ay yihiin kuwa dagaalka joogtada kula jira "kufaarta" Waxaa kaloo kooxdu ay isku dayeysaa inay fidiso "dhaqanka shahiidnimada ee dadka naftooda hura". Waxaa la qeybiyaa cajalado CD ah iyo kuwa videoga, kuwaas oo muujinaya dhalinyaro akhrisanaya shahaadadooda kama dambeysta ah iyo dardaaran, iyo iyagoo fulinaya hawlgalo is-miidaamin ah, halka wadaadaduna ay muuqdaan iyagoo amaanaya wanaagga iyo qiimaha ay leedahay qofka shahiidnimo ku dhinta. Website-ka Al-Shabaab ee Kataaib.net waxaa lagu qurxiyey sawirada dhalinyaro "shahiid" ah kuwaas oo ku dhintey hawlgalo is miidaamin ah.

Markii waqtigaa la gaarey, jawaabta Al-Shabaab waxay ahayd mid gebi ahaanteedba diiddan siyaasadda dowladda cusub si xooganna ay uga muuqatey mucaaradnimo. Shariif waxaa loo arkey inuu yahay khaain. Waxqabadkiisii hore iyo daacad u ahaanshaha Islaaminimada waxay ahaayeen kuwo shaki ku jiro oo aan la hubin, isla markaana go'aankiisa ah inuu dalka ka hirgelinayo shareecada Islaamka uu shaki hareeyey.[32] Waxaa loo arkey inuu yahay nin u shaqeynaya amaba fulinaya danaha reer Galbeedka, iyo weliba inuu yahay aalad loo adeegsanayo in lagu kala dhantaalo dhaqdhaqaaqa Islaamiga. AMISOM-na waxaa loo arkey inaaney ahayn ciidamo nabad ilaalin ah oo dhexdhexaad ah, balse ay yihiin kuwo meesha ka sii wadaya joogitaanka ciidamada Ethiopia iyagoo magac kale isticmaalaya.

Dagaalka dhinaca dacaayadda amaba propagandada ee la doonayey in lagu waxyeeleeyo shakhsiyadda Sheikh Shariif iyo in la kashifo amaba wax laga sheego nooca Islaamka uu aaminsan yahay waxay dibedda soo dhigtey heerka uu gaarsiisan yahay baqdinta ay Al-Shabaab ka baqeyso Sheikh Shariif. Qolyaha mayalka adag waxaa khalkhal geliyey suuragalnimada in xubno badan ay ka goostaan kuna biiraan Dowladda Federaalka KMG. Cabsidan ah in xubno mucaarad ah ay ka dhex dilaacaan kooxda dhexdeeda ayaa sii lixaadsatey markii ay soo baxeen bishii February sannadkii 2009ka, warar sheegaya in Sheikh Shariif uu wadahadal kula jiro hoggaamiyeyaal muhiim ah oo ka tirsan mucaaradka, sida Mukhtar Robow iyo Yuusuf Indha Cadde.[33] Wax yar kadib, laba kooxood oo ka tirsanaa Al-Shabaab kuwaas oo kala ah Caanoole iyo Raas Kaambooni - waxay ku biireen Xizb al-Islam. Sidaa darted, qolyaha mayalka adag waxay ku xisaabtameen, in dagaal lala galaa Shariif ay tahay mid in deg deg loo qaado u baahan, muhiimna u ah sii jiritaankooda. Dagaalkaasi waxaa uu ahaa in marka hore lagu saleeyo dhanka aydolojiyadda amaba fikirka, halka la beegsanayana ma ahayn oo keliya bulshada inteeda kale, balse xitaa kuwa dhexdooda ah ee mowqofkooda dhinaca fikirka ah uu liicdo.

Amiirka dhaqdhaqaaqa Al-Shabaab, Axmed Cabdi Godane, iyo asxaabtiisa shisheeye ee jihaad doonka ah waxay wadeen hawlgal hoose oo sir ah oo ay ka dhex fulinayeen kooxda dhexdeeda laga soo bilaabo dhamaadkii 2008, waxayna tani u noqotey fursad ay ku bilaabaan isku shaandheyn xooggan oo laga dhex fuliyo Al-Shabaab. In badan oo ka mid ah taliyeyaasha darajada dhexe iyo kuwa hoose iyo maamuleyaasha maxalliga ah ee loo arkayey inay dhanka fikirka aad u jilicsan yhiin ayaa la bedeley amaba xilalkii ay hayeen laga qaadey.[34]

[32] Ololahahe Islaamiyiinta mayalka adag ee ay Sheikh Shariif kaga dhigayeen nin Islaaminimada ku tuntey, isla markaana mowqifkiisa qunyar socodnimo ee Islaamiyadda ku tilmaamey mid aan dhab ahayn waxaa uu bilowdey isla markii ay burbureen Midowgii Maxkamadaha Islaamiga bishii January, sannadkii 2006da. Waxaa ololahaasi ay sii xoogeysteen markii uu socdey dadaalkii nabad raadinta ee Djibouti ka. Marka dusha sare laga eego, waxay ahayd isku day la doonayey in lagu ceebeeyo amaba lagu karaama tiro Islaaminimadiisa loogana hortegayo taageero uu ka helo shacabka. Waxa dhabta ah ee ay beegsanayeen ma ahayn siyaasadda Islaamiga ee Sheikh Shariif ee waxay si gaar ah u beegsanayeen iimaankiisa. Kooxda Al-Shabaab oo uu horkacayo hoggaamiyahooda, Axmed Godane, ayaa xubno ka tirsan waxay kulan yeesheen dhamaadkii sannadkii 2007da si ay u soo bandhigaan kiis ah in Shariif uu murtad yahay amaba diinta ka baxay. Bilihii ugu horeeyey ee sannadka 2009, Godane, Shongole, Zeyli'i iyo kuwo kale, waxay dhex mareen dhulka Al-Shabaab ka taliyo, iyagoo jeedinaya khudbado diini ah oo ay dadka uga digayaan inay taageeraan Sheikh Shariif. Websiteyada xiriirka la leh Al-Shabaab – kuwaas oo aan haatan shaqeyn — waxay xiligaasi soo geliyeen khudbadaha Godane uu ku dhaleeceynayo Shariif iyo hanaankii nabad raadinta ee Djibouti. Bishii March, 2009, Dowladda Federaalka KMG waxaa logu yeerayey "*kooxda ridada*" (amaba kooxdii diinta ka baxdey) iyo Shariifka oo loogu yeerayey "*Amiirka kooxda ridada*" (hoggaamiyihii kooxda diinta ka baxdey). Tani ma ahayn oo keliya aalad loo adeegsanayey in lagu baahiyo amaba lagu fidiyo dagaal afka ah, balse waxaa uu ahaa olole ereyada la isticmaalayo si taxaddar leh loo xushey, ereyo diimeed ay soo curiyeen garabka Takfiirta ee Al-Shabaab si ay u meel mariyaan xukunka ridada amaba diin ka tegista ee ka dhanka ah Sheikh Sharif iyo dowladiisa, walow inta badan ereyadaasi looga leexanayey xukunka caadiga ah ee diinta Islaamka ee (*fatwa*), kuwaan oo noqon lahaa kuwo lagu murmo sharci ahaanshahooda, lagana yaabo inay culumada kale ee diinta Islaamka ku tilmaamaan been.

[33] Walow Roobow uu in badan beeniyey inuu xiriir la sameynayey Shariif, iyadoo loo kala dabqaadayo, hadana waxaa jira ilo lagu kalsoonaan karo oo sheegaya in hoggaamiyeyaal qabiil oo caan ah oo Muqdisho ku sugan ay u tageen dhowr jeer si ay uga dhaadhiciyaan inuu heshiis la galo Shariif. Wadahadaladaasi waxay burbureen bishii April 2009, waxaana ugu wacnaa cadaadis ka imaanayey xubnaha mayalka adag iyo kuwo ku jirey Dowladda Federaalka KMG oo dareensanaa in haddii Robow ku soo biiro dowladda ay taasi horseedi karto inay wiiqdo isku dheelitirka dhanka qabiilka. Wax yar kadib Indha Cadde ayaa waxaa uu u goostey dhanka Dowladda Federaalka KMG. Waxaa uu ahaa xubin muhiim ah, kaas oo aan dowladda ku soo biirinin oo keliya boqolaal ka tirsan dagaalyahanadiisa, balse ku soo biiriyey oo kale xog iyo warbixino muhiim ah oo uu ka hayey kooxda Al-Shabaab.

[34] Dhibanayaashii ugu horeeyey ee sida weyn ugu waxyeeloobey waxay ahaayeen saraakiishii ku xirnaa kooxaha qabiilka ku dhisan kuwaas oo horey ugu biirey Al-Shabaab sababo dhaqaale awgood. Bilowgii, Al-Shabaab waxay kasbatey taageeradooda, waxayna siisey lacag iyo waxyaabo kale oo ay ku soo jiidaneyso si ay u dejiyaan amaba nabad uga dhigaan qabaailka ku hoos nool dhulka ay ka taliyaan Al-Shabaab ayna u muuqdaan wakiilo. Khibradahooda isku xirka qabiilka waxaa loo arkayey mid muhiimad balaaran oo dhinaca siyaasadda leh. Mar haddii kooxaha qabiilka ku dhisan sida Caanoole iyo Raas Kaambooni ay u goosteen dhanka ururka Xizb al-Islam, halka

Tusaale ahaan, Mukhtar Roobow oo ka dhashey (Raxanweyn- Laysaan) waxaa laga qaadey xilkii afhayeenka ururka waxaana loo direy goobta uu ku xooggan yahay ee gobollada Bay iyo Bakool.[35]

Waxaa xaqiiq ah, in qabiilku uu weli door muhiim ah ka cayaarayey xulashada amaba doorahada ninkii beddeley, Cali Maxamuud Raage ("Cali Dheere"), oo ah hoggaamiye dhalinyaro ah oo ka so jeeda beesha Murursade. Shakhsiyadda Raage iyo fikradihiisa waxay si weyn uga geddisan yihiin kuwa Roobow, waxaana tan iyo xiligaa uu muujiyey inuu yahay nin aan xagjir ahayn. Shaki la'aan magacaabistiisa waxaa looga gol lahaa in loogu abaal mariyo beesha Murursade, oo iyada iyo beesha kale ee Duduble ay yihiin laf dhabarka Al-Shabaab ee gobolka Banaadir (oo ka kooban Muqdisho iyo goobaha ku xeeran).[36] Cagajiid kasta iyo shaki heerkuu doonaba ha gaaree oo ay xubnaha mayalka adag ka qabaan qaab dhaqameedka Raage iyo "dhaqan xumadiisa", ma muuqato inay iminka ku dhaqaaqi doonaan talaabo ka dhan ah amaba ay xilka kaga xayuubiyaan. Haddii ay sidaa yeelaan waxay noqon doontaa sida iyagoo soo dhoweysta aargoosi kaga yimaada beesha Murursade. Tiro aad u badan oo beeshan ka tirsan haddii ay isaga huleelaan kooxda Al-Shabaab waxay taasi noqon doontaa dhabar jab weyn iyo go'aan waqti xun ku soo beegmey, marka loo eego qorshaha Dowladda Federaalka KMG ee ku aadan weerar milateri oo ka dhan ah mucaaradka oo ay dooneyso inay qaado bilaha soo socda si ay gacanta ugu dhigto dhulka ay ka taliyaan mucaaradka.

### 2. Xil la wareegista shisheeyaha iyo adeegsiga awood dhexe

Al-Shabaab waxaa magaceeda lagu bedeley oo laga dhigey Xarakada Mujaahidiinta Al-Shabaab sannadkii 2009 si ay ugu xoojiso aqoonsigeeda dhinaca jihaadka iyo muujinta hadafyadeeda caalamiga ah. Walow Godane badanaaba loo saariyo inuu yahay kan sida weyn uga macaasha isbedeladan, isla markaana jagadiisa amiirnimada la sii xoojiyey, ayaa hadana awoodda dhabta ah waxay gacantooda gashey koox yar oo ka kooban dagaalyahano shisheeye (*muhajiriin*) iyo xubno kooban oo Soomaali ah (*ansaar*).[37] Waa kooxdan yar, balse

hoggaamiyeyaasha sida Roobow oo kalena dhinac la isaga weeciyey, waxay joogitaanka saraakiishaasi noqotey mid daciif ah amaba liicda. Si kastaba ha ahaatee, iyadoo ay sababtu tahay Al-Shabaab oo gacanta ku haysa inta badan koonfuurta Somalia, waxaa meesha ka baxdey baahida ah in la iska sii haysto saraakiil mowqifkooda dhinaca Salafiga jihaadka ku dhisan ay shaki ka qabaan xubnaha xagjirka ah. Wareysiyo khadka telefonka oo ay qaaddey hay'adda Crisis Group, Mogadishu, Kismaayo, Nairobi, January 2010.

[35] Xil ka qaadistii Roobow ee jagada muhiimka ah ee afhayeennimada looga tuurey iyo talaabadii xigtey ee looga dhigey nin go'doon ah oo aan muhiim ahayn waxaa ka dambeeyey Godane. Labada nin waxaa ka dhexeeyey khilaaf muddo soo jirey, kaas oo qeyb ahaan ku saleysnaa dhinaca aydolojiyadda, qeybna ku saleysnaa tartan dhinaca awoodda siyaasadda. Walow Godane uu ahaa "*Amiirka*" – a darajadaasi oo leh awood iyo sharaf intaba - hadana dadka badankii waxay u arkayeen marka la barbardhigo Roobow nin yar marka dhanka siyaasadda loo eego. Isagoo aan haysan goob uu ka heli karo taageero dhinaca qabiilka, aana lahayn haybad sare, kuna nool nolol keli ah isagoo ka baqaya in la dilo, Godane waxaa uu ku guuldareystey inuu dhanka soo jiidashada shacbiyadda kala mid noqdo Roobow. Hase yeeshee, Godane waxaa uu ka dhaadhiciyey xubnaha awoodda badan leh ee ka tirsan ajaanibka jihad doonka inay dhinac isaga weeciyaan ninka ay iska soo horjeedaan ee Roobow. Roobow waxaa xiriir wanaagsan oo debecsan uu la lahaa xubnaha jihaad doonka ee shisheeyaha ah, isagoo in badan oo xubnahaasi ka mid ah ku soo dhoweeyey amaba ku hayey gobolada uu ku awood badan yahay amaba uu ka soo jeedo ee Bay iyo Bakool. Xiriirka ayaa xumaadey markii Baydhabo gacanta lagu dhigey, waxaana lagu eedeeyey inuu badbaadiyey xubno ay isku qabiil yihiin oo ka tirsanaa saraakiisha Dowladda Federaalka KMG ee Somalia, isagoo iska dhegatirey amar la siiyey oo ahaa in raggaasi gacanta lagu dhigo oo maxbuus ahaan loo hayo. Kalsoondii lagu qabey ayaa sii yaraatey markii uu aqbaley inuu wadahal la yeesho ergo ka socotey Sheikh Shariif. Godane ayaa taa ka faaideystey si uu u kala fogeeyo Roobow iyo saaxibadiisii hore.

[36] Hadalada uu Raage shacabka u jeedinayo waxay ahaayeen kuwo taxadar ku dheehan tahay, si cadna u muuqdey kuwo loogu talagaley inaan shacabka lagu fogeyn. Hadalkii uu ku beeniyey in Al-Shabaab ay ku lug lahayd weerarkii Hotel Shaamow waxaa weriyeyaal badan oo ka qeybgaley shirkiisa jaraaiid ay u qaateen run. Beeninta weerarka iyo muujinta sida ay uga xun yihiin dhimashada dad rayid ah waxay tan iyo markaasi dhalisey in wax la iska weydiiyo saameynta uu ku dhex leeyahay ururka. Ilaha qaarkood sida Roland Marchal waxay sheegayaan in amarka weerarka lagu fuliyey uu bixiyey garabka Takfiiriga ee xubnaha jihaad doonka shisheeye, sidaa darteedna laga yaabo inaanu Raage waxba kala socon abaabulkiisa hore. Markii bishii February 2010 uu websiteka Al-Shabaab ee Al-Qimmah ku soo baxay codka hees jihaadi ah oo Afka Sawaaxiliga ah, *Nairobi tutafika* (Nairobi waan soo gaari doonaa) oo ay ku jireen ereyo si cad loogu hanjabayo Kenya in la weerari doono, Raage markiiba waa uu beeniyey, waxaana uu ku tilmaamey wax la macmaley, isagoo intaa ku darey inaanu dhaqdhaqaaqa Al-Shabaab aanu ku talo jirin inuu waxyaabo noocaasi ah fuliyo. Mowqifkani waxaa uu khilaafayaa kan ay qabaan xubnaha mayalka adag sida Shongole iyo Zeyli'i, kuwaas oo horey si cad ugu hanjabey Kenya. Waxay u muuqataa in Raage uu doonayo inuu mowqifkiisa u gaarka ah ku dhaqmo, isla markaana u hadlo kooxda "wadaniyada" aaminsan ee aan la dhacsaneyn jihaad doonka shisheeye. Aragtidan xiisaha leh waxay u muuqataa inay ka markhaati kaceyso amaba ay cadeyn u tahay in Roobow iyo Raage ay si qarsoodi ah isugu dayayeen bilihii dhowaa inay abuuraan gole ay ku mideysan yihiin mucaaradka Al-Shabaab dhexdiisa. Wareysiyo ay khadka telefonka ah oo ay qaadey hay'adda Crisis Group, Mogadishu, February, March, 2010.

[37] Al-Shabaab waxay si rasmi ah u isticmaashaa ereyada *ansaar iyo muhajiriin* si ay u muujiso labada qeybood ee waaweyn ee

saameyn xooggan iyo awood balaaranba leh oo noqotey awoodda ka dambeysa ee hageysa fikradaha xagjirnimada fog u janjeera ee Al-Shabaab.

Kooxdani waxay isku aragtaa inay tahay ilaaliyaha dhabta ah ee imaanka "saxda" ah, waxayn dareensan tahay in dhaqdhaqaaqa uu luminayo isku xirkiisa dhanka aydolojiyada amaba fikirka iyo waajibaadka ka saaran hirgelinta iimaanka Salafiga Jihaadka ku saleysan, taas oo ka dhalatey anshax xumo iyo faragelin kaga timid xubno "qabiilka u daacad ah".[38] Waxaa muuqata in nidaam awoodda meel dhexe la isugu geynayo in la qaatey, taas oo suuragelisey in dagaalyahanada shisheeye ay si gaar ah ula wareegeen awoodda socodsiinta hawlgalada ururka. Guud ahaan natiijada isbedeladan waxay noqotey in Al-Shabaab ay si aad ah ugu sii dhowaatey ururka al-Qaeda, waxaana xiriirka ka dhexeeya uu sii xoogeysety sannadkii la soo dhaafey.[39]

Agendahaasi waxaa si hoose iyo si cadba uga soo horjeestey xubnaha muhiimka ah ee Soomaalida ee ku jira dhaqdhaqaaqa iyo xitaa qeyb weyn oo ka mid ah ururka.[40] Kuwa loogu yeero inay yihiin "mucaarad" waxay ilaa iyo iminka u muuqdaan kuwo ka fogaanaya tartan awoodeed awoodda looga xayuubinayo *muhajiriinta*.[41] Ka sokow awoodaha balaaran iyo fursadaha ay haystaan *ansaarta*, hadana si taxadar ku jiro ayay u feejigan yihiin, marka loo eego hubka faraha badan, awoodda sare ee goobaha dagaalka iyo xeeladaha heerkoodu sareeyo ee ay leeyihiin *muhajiriinta*. Qolyaha "mucaaradka" haatan ma laha awood, agab iyo dhaqaale ku filan oo ay ku sameyn karaan wax iska caabin. Waxay kaloo iska ilaalinayaan inay ku dhaqaaqaan fal kasta oo

---

ururku uu ka kooban yahay. Ereyadani waxaa markii ugu horeysey lagu isticmaaley Medina sannadkii 640 xiligii uu noolaa Nabi Muxammad. Muslimiintii ugu horeeyey ee ka yimaada Makka, kuwaas oo ka soo cararayey tacadiyo loo geysanayey ayaa waxaa la oran jirey al-*muhajiriin*; Dadkii ku soo dhoweeyey Medina ayaa waxaa loo yiqiiney al-*ansaar* (ama kuwii gargaarka fidinayey). Waxaa xaqiiqdii jira calaamado diini ah iyo muhiimad ruuxi ah oo u dhexeeya ereyadan. Isticmaalkooda waxaa looga gol leeyahay in dib loogu soo nooleeyo awoodda walaalaha Islaamka kaas oo qeexaya xiriirka taariikhiga ee u dhexeeyey *ansaar* iyo *muhajiriin*. Jiilkii ugu horeeyey ee Muslimiinta - oo ka koobnaa *ansaar* iyo *muhajiriin* – waxaa marka loo eego madhabta Sunniga lagu tilmaama *salaf al-salih* (dadkii wanaagsanaa ee iimaankooda sugnaa); in noloshooda lagu daydaa waxaa loo haystaa inay tahay arin muhiim ah oo dhanka imaanka ku saabsan. Salafiyadu waxay sare u qaadey fikradan ah "in lagu daydo dadka wanaagsan ee imaankooda sugan yahay" Iyagoo ka dhigey fal muhiim ah oo iimaanka heerkiisa ugu sareeya. Iyadoo lagu saleynayo fikradadahani diimeed, qofka Soomaaliga runta ah ee aaminsan Salafiga jihaadka ku saleysa n waxaa la filayey inuu si cad u qaato *muhajirnimada* isla markaana uu dadka magan geliyo, soo dhoweeyo uuna difaaco iyadoon loo eegeyn midabkiisa iyo dalka uu u dhashey toona, sida ay ahaayeen *ansaarta* taariikhda ku xusan. Mabda'ani—oo ay si xeeladeysan uga faaideysteen jihaad doonka shisheeye – ayaa ah salka xiriirka aan wanaagsaneyn ee u dhexeeya Somalia iyo dalalka reer Galbeedka. Halka qofka caadiga ee reer Galbeedka uu *muhajiriinta* u arkayo inay yihiin argagixiso iskeed isu abaabushey oo mar walba dagaal hor leh ku jira, Soomaalida aaminsan Salafiyada - walow aaaney gebi ahaantooda ahayn kuwo colaad u joog ah amaba mayal adag - waxaa laga yaabaa inay dareemaan in lagu qasbayo inaysan fulin waajibaadkooda diimeed ee saxda ah ee ay ku magan gelinayaan gargaarna ugu fidinayaan walaalahooda MuslimiintaSalafiga ah, halkaas oo ay ka helayaan *thawaab* (ama ajar diini ah). Dad badan oo Muslimiinta diinta sida weyn ugu dheggan, falka "lagu raaligelinayo" Allah iyo helista *thawaabta*, waxay ka qiimo badan tahay wax walba oo aduunyada nolosheeda la xiriirta. Waxaa loo maleeyaa in boqolaal dagaalyahano ajaanib ah oo ka kala yimid qeybaha kala duwan ee dunida Muslimka iyo bulshada Soomaalida ee dalalka dibedda ku nool loo soo qorey inay ka dagaalamaan Somalia. Kala bar oo bar dadkaasi waa Kenyan, oo ay ku jiraan Soomaalida dalka Kenya; inta kale badankooda waxay ka soo jeedaan dalalka Bangladesh, Chechnya, Pakistan, Sudan iyo Tanzania. Eeg "Report of the Monitoring Group on Somalia pursuant to Security Council resolution 1853 (2008)", S/2010/91, 10 March 2010, p. 51. Waxaa iyana jira tiro yar oo dagaalyahano ka yimid dalalka reer Galbeedka, oo ay ku jiraan Denmark, Sweden, Ingiriiska iyo Mareykanka, badankoodana waa Soomaalida ku dhaqan dalalka dibedda. Si aad u heshid liiska dadka muhiimka ah ee ajaanibka ee kooxda Al-Shabaab, eeg fn. 45 hoos.

[38] Wareysi khadka telefonka oo ay qaadey Crisis Group, qof ka soo baxsadey Al-Shabaab, Mogadishu, January 2010.

[39] Horumarka amaba guulaha ay ku talaabsatey Al-Shabaab sannadkii hore, waxay si gaar ah dareen u gelisey dalalka ka baqaya in Somalia ay noqoto hoy nabad ah oo Al Qaacida saldhig ka dhigato. Maamulka madaxweyne Obama, oo iyadu la timid calaamado muujinaya inay dooneyso dib u eegis ay ku sameyso istraaatiijiyadeeda ku aadan Somalia waxay arintani ku dhalisey walaac balaaran. Kuwa taageera istaraatiijiyadda ka hortaga argagaixisada mayalka adag waxay dareemeen in doodooda la garowsadey amaba ay dad badani markan rumeysteen. Mareykanku waxaa uu kordhiyey diyaaradaha wax kormeera ee aan duuliyaha wadin , kuwaas oo inta badan lagu arkayey koonfuurta Somalia, waxaana meel ku dhow magaalada dekedda leh ee Kismaayo lagu diley dhamaadkii 2009ka, Saleh Ali Nabhaani oo lagu diley hawlgal ay fuliyeen ciidamada gaarka ah ee Mareykanka. Waxaa kale oo si aad ah xaaladda amaanka loo adkeeyey dalalka gobolka ku yaala qaarkood sida Ethiopia iyo Kenya, kuwaas oo haatan dunida u muujinaya inay jirto khatar joogta ah oo aan ku koobneyn waddamada gobolka, balse xitaa saameyn karta waddamo aad uga fog Geeska Afrika.

[40] Wareysi khadka telefonka oo hay'adda Crisis Group la yeelatey xubin ka goostey kooxda Al-Shabaab, Mogadishu, January 2010.

[41] Xubnaha mucaaradka ah amaba ka soo horjeedda siyaasadda ururka ee Al-Shabaab ka tirsan marar dhif ah ayay hadlaan amaba ay goobo fagaaro ah uga hadli karaan, iyagoo ka baqaya inay dilaan xubnaha mayalka adag ee kooxda ka tirsan.

sii kala qeybin kara amaba wiiqi kara kooxda Al-Shabaab, xiligan cakiran ee Dowladda Federaalka KMG ee ay taageerada ka haysata dalalka reer Galbeedka ay isku diyaarineyso weerar culus oo ay ku qaado kooxaha mucaaradka.

Ilaa iyo haatan, heshiis aan caga badan ku taagneyn - oo sida lagu sooo waramayo ay ka soo shaqeeyeen taageerayaasha wadaadada Salafiga ee Soomaalida iyo kuwa shisheeye, bilooyin kadib oo ay dibedda iyo gudaha ka socdeen wadahadalo hoose, ayaa u muuqda mid weli shaqeynaya.[42] Labada geesood waxay u muuqdaan kuwo doonaya inay isu muujiyaan inay wax u eg midnimo amaba kuwo ay wadashaqeyn ka dhexeyso. Hoggaamiyeyaashooda ayaa marka ay hadalo jeedinayaan u muuqda kuwo isku af ah, iyagoo aad uga taxadarsan inuu ka soo dhaco hadal khilaafsan heerarka Jihaadiga. Hase yeeshee, way adag tahay in la arko sida midnimo dhab ah loo gaari karo iyadoo aaney dhicin khilaaf weyn oo isku bedeli kara khalaalase dhiig uu ku daato.

Dadaalka xooggan ee Al-Shabaab ee ay dooneyso inay sumcadeeda ku hagaajiso waxaa barbar socda dadaalo hoose oo dib u habeyn loogu sameynayo qaab dhismeedka ururka si loo soo celiyo kala dambeynta dhanka awoodda, isla markaana loo xajin lahaa awoodda xubnaha mayalka adag.

Waxa marka hore la beegsanayey in awoodaha laga soo wareejiyo maamulka dhexe isla markaana la yareeyo qaab dhismeedka awoodaha kala dambeynta amaba jaranjarta taliska, iyadoo sannadkii 2007 da horaanteedii la qaatey hab wax lagu maamulayo, kaas oo u suurageliyey kooxaha ururka ka tirsan amaba isbaheysiga la ah inay helaan furfurnaan dhanka maamulka iyo ismaamul u gaar ah.

Hase yeeshee, markii la heley awood weyn oo dhuleed iyo mid maamul intaba, isla markaana mucaaradka ay muuqdeen kuwo guusha ay gaareen ay sugan tahay, ayaa hadana laga soo bilaabo bartamaha 2008 ilaa wixii ka dambeeyey ay muuqatey in habkaasi uu noqdey mid aan si wanaagsan u soo jiidan xubnaha mayalka adag.

Fikir ahaan waxay qabeen inay jiraan xubno damac badan oo wata dano qabiil inay ka faaideysteen nidaamkaasi si ay u dhistaan awoodo iyaga u gaar ah iyo ximaayado amaba maamulo qabiili ah oo ay leeyihiin.

Si loo xakameeyo ragg ay ka midka yihiin Roobow iyo Turki, oo loo arkayey inay si weyn uga faaideysanayeen habkan,[43] sidaa darteed talaabo xilalka ay hayaan looga xayuubiyo amaba la gooniyeeyo ma ahayn mid ku filan.

Waxaa lagama maarmaan ahayd in dib u habeyn lagu sameeyo qaab dhismeedka ururka lagana dhigo mid suuragelinaya in awoodda oo dhan ay gacanta u soo gasho xubnaha sida weyn ugu dheggan amaba u aaminsan fikradaha iyo mabaadii'da Salafiga jihaadka ku saleysan, iyadoo ajendaha ugu weynna uu yahay jihaadka caalamiga.[44]

---

[42] Wareysi khadka telefonka oo hay'adda Crisis Group la yeelatey, wadaad Muqdisho jooga, December 2009. Sida laga soo xigtey wadaadkan, wadahadalada waxay bilowdeen bartamihii sannadka 2009 waxayn socdeen ilaa bishii November. Qaar ka mid ah wadahadaladaasi waxaa lagu qabtey Muqdisho, Afgooye, Kismaayo, Baraawe (Brava), Marka iyo Doobley. Qaar waxay ahaayeen kuwo qaab dhexdhexaadin ah, qaarna waxay ahaayeen kuwo fool ka fool ah oo ay ku lug yeesheen amaba ka qeybgaleen xubnaha dhinaca diinta ee ugu culus labada dhinac, sida Godane iyo Robow. Qaar ka mid ah kulamadaasi, arrimo dhinaca amaanka awgood, waxaa ay ku qabsoomeen iyadoo loo kala dabqaadayo oo xubno kale oo lagu kalsoon yahay ay wakiilo yihiin, iyadoo waraaqo ay ku qoran yihiin mowqfika koox kast iyo go'aamada oo afafka Carabiga iyo Soomaaaliga ku qoran loo qeybiyey sida waraaqo la isku dirayo. Wadaad caan ah oo deggan gobolka khaliijka ayaa la sheegayaa in lagu soo darey wadahadaladan, iyadoo faragelintiisa, gaar ahaan ridista xukun diini ah oo lagu xalinayo mas'alado muhiim ah sida (aqoonsiga qabiilka, Shareecada, jihaadka, xeerarka dagaalka ee diinta Islaamka iyo fikirka haatan jira iyo bulsho is waafaqsan amaba is raacsan sida ku cad fikirka Salafiga) la rumeysnaa inay yihiin kuwo kama dambeys ah, taas oo horseedey in si ku meel gaar ah loo soo afjaro khilaafkii dhowrka bilood taagnaa.

[43] Robow "Abu Mansur" ayaa waxaa lagu doodaa inuu yahay shakhsiga ugu xushmad badan kooxda Al-Shabaab ee ka soo jeeda koonfuurta Somalia, gaar ahaan gobolada Bay iyo Bakool, goobahaasi aoo ay ku badan yihiin qabiilka uu ka dhashey ee Raxanqeyn. Markii muddo kooban ay kooxda gacanta ku dhigtey magaalada Diinsoor, dhamaadkii bishii March, 2007, waxaa uu khudbad socotey muddo laba saacadood ah u jeediyey dad farabadan oo aad jidbeysan. Weriye goobta joogey waxaa uu dhacdadaasi ku tilmaamey mid "taariikhi ah", sida "iyadoo la caleema saarayo madaxweyne" Wareysiyo ay qaadey hay'adda Crisis Group, Baidoa, April 2008. Intii u dhexeysey 1996 iyo 1998, waxaa uu madax ka ahaa xero la yiraahdo Al-Hudaa, oo ay magaalada Xuddur ku lahaayeen dagaalyanahanada islaamiyiinta, waxaana uu ka qeybgaley dagaaladi kooxda al-Ittihaad al-Islami kula galeen gobolka Ged, koonfuurta galbeed ee Somalia, ciidamada Ethiopia. Waxaa uu Somalia ka tegey sannadkii 2000 isagoo tababar muddo sannad ah kula soo qaatey dalka Afghanistan kooxda Taliban. Waxaa uu taliye sare oo milateri ka ahaa dagaalkii dhex marey kooxaha Ilsaamiyiinta iyo isbaheysigii qabqableyaasha dagaalka (Isbaheysiga la dagaalanga argagixisada) bartamihii 2006da. Marar dhif ah ayaa lagu arkaa goobaha fagaaraha isagoo aanan xirneyn amba aaney ka muuqan cimaamadiisa madow ee ay madaxa ku duubtaan dagaalyahananada Taliban; eeg www.kataaib.net/Aba%20Mansuur.htm.

[44] Ku dhawaaqista amaba cadeynta rasmiga ah in Al-Shabaab ay xiriir la leedahay Al-Qaacida iyo qoraalo kale oo badan oo

Natiijada waxay noqotey in Al-Shabaab muddo laba sannadood gudahood laga dhigey urur leh qaabab aan waxba laga garan Karin.[45] Godane, Shongole Iyo Ibraahim Jaamac "al-Afghani" waxay haatan madax ka yihiin hoggaan ku saleysan awoodda oo meel dhexe la isugu keeney, kaas oo ay taageerayaan koox ka tirsan dagaalyahanada shisheeye. Habka Islaamiga ee talada lagu gaaro qaab wadatashi ama *shuura* – waxay taabagal ka dhigeysaa in tabaha siyaasadeed iyo kuwa milateri sii wadajir ah loo gaaro isla markaana si adag dusha looga eego hadba sida ay ula xiriiraan silsiladda wax fulinta.[46] Godane ayaa shakhsiyan maamula goobaha ay Al-Shabaab ka taliso ee Muqdisho, isagoo adeegsanaya taliyeyaal maxalli ah amaba Soomaali ah oo laga soo xuley qabaailka.[47] Al-Afghani waxaa uu isna maamulaa Kismaayo iyo dooxada Jubba, isagoo istcimaalaya taliyeyaal laga soo dhex saarey qabaailka degaanka.[48]

Xubnaha mayalka adag, ee ay hoggaaminayaan dagaalyahanada ama jihaad doonka shisheeye, waxay leeyihiin saameyn iyo awood balaaran, iyo iyagoo haysta agabka iyo dhaqaalaha ay wax walba ugu meerin karaan amaba ku maamuli karaan kooxaha aan awoodda badan lahayn. Roobow Turki iyo hoggaamiyeyaasha kale waxay ku tiirsan yihiin hoggaamiyeyaashaasi shisheeye si ay u helaan dhaqaalaha ay ku hawlgeliyaan dagaalyahanadooda. Talaabadani waa mid muhiimadeeda leh marka loo eego dal tirada ciidamada ee ay koox waliba leedahay lagu xisaabtamayo, halkaas oo koox aan lahayn awood milateri, mid yarba ha noqotee - mar walba loo arko mid aan la jaanqaadi karin siyaasadda. Roobow waxaa uu doonayaa inuu xiriirkaasi sii socdo, taa oo ka caawineysa xaqiijinta in boqolaal ka tirsab dagaalyanadiisa aaney ka goosan. Waxaa isna sidoo kale ah Sheikh Xasan Turki, oo doonaya inuu saameynta Al-Shabaab ku adeegsado dooxada Jubba si uu u badbaadiyo waxa uga harey saameynta uu weli ku dhex leeyahay beelaha Ogaadeen.

### 3. Mucaaradad dhanka shacabka

Dhul aad u balaaran iyo maamulka oo ay gacanta ku hayaan iyo weliba awoodda milateri ee ay leedahay, midna ma caawin Al-Shabaab inay kasbato kalsoonida shacabka. Waxay Al-Shabaab caqabad weyn kala kulmeysaa dhanka maamulka, taas oo ka dhib badan halgankooda hubeysan ee dagaalka dhuumaaleysiga ah. Taariikhdeeda dhibaatooyinka ka haysta dhanka maamulka waa mid aad u daran, taas oo sii kicineysa niyad jabka shacabka, iyadoo taana ay dhanka kale sii xoojineyso xawliga is afgaranwaaga ku saleysan dhinaca fikirka iyo siyaasadda ee u dhexeeya hoggaanka Al-Shabaab. Waxaa jira isbedel muuqda oo ku dhacey ra'yiga shacabka. Xagjirnimada Al-Shabaab iyo asal raacimadooda diimeed iyo weliba awood adeegsiga ay doonayaan inay shacabka ku soo rogaan xeerar diimeed iyo kuwo bulsho oo la jaanqaada noloshooda waxay niyad jab weyn ku abuurayaan shacabka, iyo weliba qaxooti hor leh oo nooc cusub ah: rag iyo dumar, kuwaas oo dareemaya cadaadis iyo dhibaato loo geysanayo, waxa ay aaminsan yihin iyo habkooda nololeed awgeed. Wararka ku saabsan saameynta aan isu dheelitirneyn iyo awoodda ay xajisteen dagaalyahanada shisheeye, oo ay u sii dheer tahay wararka la isla dhex marayo ee sheegaya in dagaalyahanadaasi shisheeye ay amreen weeraradii ismiidaaminta ahaa ee lagu qaadey xaflad qalin jebin ah oo ka dhacdey Muqdisho, waxay shacabka Soomaaliyeed, kuwa gudaha iyo dibedaba ku dhaliyeen caro aad u badan. Olole cusub oo lagu burburinayo qubuuraha muslimiinta Suufiga oo ay Al-Shabaab ka bilowdey magaalada Muqdisho dhamaadkii bishii March, 2010 waxay dhalisey walaac aad u balaaran iyo naceyb loo

ururka ku xiriirinaya jihaadka Yemen iyo Falastiin waa in sidan loo fahmaa.

[45] Kuwani, iyo hawlgalada Al-Shabaab, waxaa ka mid ah: Fazul Abdullah Mohamed (Jasiiradaha Comoros ),taliyaha guud ee Al-Shabaab; Sheikh Mohamed Abu Faid (haysta dhalashada Sacuudiga),maalgeliyaha iyo "maamulaha" Al-Shabaab; Abu Suleiman Al-Banadiri (Somali asalkiisu u yahay Yemeni), la taliyaha Godane; Abu Musa Mombasa (Pakistan), dhowaan ayuu yimid si uu u bedelo amaba ula wareego xilkii Saleh AIi Nabhan, oo lagu diley hawlgal milateri oo ay Mareykanku fuliyeen, waxaa uu qaabilsan yahay amaanka iyo tababarka Al-Shabaab;Abu Mansur Al-Amriki (haysta dhalashada Mareykanka), maalgelinta dagaalyahanada shisheeye; Mohamoud Mujajir (Sudan), qorista dadka la doonayo inay is qarxiyaan amaba is miidaamiyaan iyagoo bambaano isku qarxinaya; iyo Abdifatah Aweys Abu Hamsa (Soomaali tababar ku soo qaatey Afghanistan), taliyaha kooxda Mujahidiinta Al-Quds. Dukumenti sir ah oo leedahay AMISOM oo ay hay'adda Crisis Group heshey.

[46] Wareysiyo ay magaalada Nairobi ku qaadey hay'adda crisis Group, iyo wareysiyo dhanka telefonka ah, Mogadishu, February 2010.

[47] Waaxaa kuwaan ka mid ah: Cali Maxamed Xuseen (Abgaal), guddoomiyaha gobolka Banaadir; Axmed Qoorgaab (Murursade), taliye ciidan: Maxamed Fiidow (Murursade) agaasime guud: Sheikh Yuusf Macallin Ciise (Abgaal), maamule guud, Degmada Yaakhshiid: Sheikh Xasan Afraxow (Saleebaan), maamule dhanka hawlgalka, Mogadishu: Sheikh Bashiir Maxamed Maxamuud (Saleebaan), maamule dhinaca hawlgalka, Degmada; iyo Khaliif Cadalle (Habar Gedir/Cayr), ku xigeenka madaxa hawlgalka. Dukumenti sir ah oo leedahay AMISOM, oo ay hay'adda Crisis Group heshey. Godane waxaa uu ka dhashey qabiilka Isaaqa, lafta Arab, ee ku nool waqooyiga Somalia.

[48] Waxaa kuwan ka mid ah: Xasan Yacquub; Cali Xoog, madaxa amaanka gobolka Jubbada Dhexe; iyo Xuseen Geedi (Ogaadeen), guddoomiyaha gobolka Jubbada Hoose. Dukumenti sir ah oo leedahay AMISOM, oo ay hay'adda Crisis Group heshey. Al-Afghani waxaa uu ka dhashey Isaaq/Habar Awal, oo dega waqooyiga.

qabo Al-Shabaab.[49] Taageerayaal badan oo ka tirsan ururka Ahlu Sunna Wal Jamaaca waxay Al-Shabaab u yaqaanaan "*xabaala qodato*".

Waxaa haatan iska cad in arinta dagaalyahanada shisheeye ay tahay umuur door weyn ku leh colaadda Somalia. Hab dhaqankooda ku saleysan dagaalka, xagjirnimada siyaasadeed ee aan gorgortanka lahayn iyo fidinta fikradaha xagjirnimada waa kuwo dhaawac weyn ka geysanaya Somalia, haddiiba aaney ahayn kuwo gebi ahaanba meesha ka saaraya in la helo xal siyaasadeed oo lagu soo afjaro mushkiladda dalka ka aloosan. Dagaalyahanada ajaanibka ah waxay Sheikh Shariif iyo dowladdiisa ku saleysan Islaamka qunyar socodka u arkaan khatar weyn. Waxay ka baqayaan in Islaamka qunyar socodka laga yaabo inuu soo jiidan karo "mucaaradka" ku dhex jira kooxdooda, iyo weliba shacabka tirada badan ee haatan ku hoos xayiran xukunkooda, taasina ay akhirkii dhalin karto xal siyaasadeed oo la gaaro.

Waxay kaloo talaabadaas u arkaan inay horseedi karto in shaki uu soo galo joogitaankooda Somalia. Cabsidaas ayaa ah tan salka u ah inay mar walba dadaal dheeri ah geliyaan inay sii huriyaan colaadda Somalia.

## B. XIZB AL-ISLAM

Ururka Xizb al Islaam waxaa la aasaasey bishii February sannadkii 2009, wax yar kadib markii Sheikh Shariif loogu doortey shirkii Djibouti inuu noqdo madaxweynaha Dowladda Federaalka Ku meel gaarka.[50] Waxaa uu ka dhignaa sida gaari uu Sheikh Xasan Daahir Aweys doonayey inuu ku badbaadiyo fursadihiisa siyaasadeed oo markaa u muuqdey kuwo si liicayey. Waxaa uu ogaa in damaciisa ku aadan inuu dib gacantiisa ugu soo celiyo kooxda Al-Shabaab aaney suuragal ahayn, gaar ahaan marka loo eego ninkii dhalinyarada ahaa ee uu ku tiirsanaa, Ceyrow, aanu nooleyn.[51] Rajadu waxay ahayd in la soo dhiso gole mideeya mucaaradka ka soo horjeeda dowladda Shariif. Xizb al-Islam waxaa uu ahaa isbaheysi ay sameysteen afar kooxood oo mucaarad Islaamiyiin ah, kuwaas oo ka soo horjeeda hanaankii nabad raadinta Djibouti ee ay Qaramada Midoobey soo abaabushey: Garabkii Asmara ee Isbaheysiga Dib u Xoreynta ee uu horkacayey Sheikh Aweys (Alliance for the Re-liberation of Somalia), ARS (Habar Gedir/Cayr /Cabsiye); Caanoole, oo uu hoggaaminayey nin ay si weyn isugu dhow yihiin Aweys oo magaciisa la yiraahdo Sheikh Cabdullaahi Cali Xaashi (Carab Maxamuud Saalax);[52] Raas Kaambooni, oo uu horkacayey Sheikh Xasan Cabdullaahi Xirsi, "Xasan Turki" (Ogaadeen, Maxamed Subeer); iyo Jabhatul Islam, oo marka magaceeda la soo gaabiyo loo yaqaano Jabiso, uuna horkacayey Sheikh Cabdullaahi Axmed Cumar (Gaaljecel).[53]

Aweys iyo saaxibadiisa ay muddada dheer wada socdeen ee waqtiyadii kooxda Al-Ittixaad - Turki iyo Xaashi - waxay doorashada Sheikh Shariif u arkayeen xishmad darro loo muujiyey marka loo eego mansabkooda iyo muddada dheer ee ay ku soo dhex jireen dhaqdhaqaaqa Islaamka Somalia. Waxaa laga yaabaa in arinta kale ee muhiimka ah ay tahay iyagoo aaminsanaa in shirka Djibouti gebi ahaantiisaba uu ahaa "shirqool" ay soo maleegeen dalalka reer galbeedka oo looga gol leeyahay in lagu sii kala qeybiyo Islaamiyiinta, isla markaana la sharciyeeyo hanaan nabadeed oo aan loo dhameyn, ujeeddada laga lahaana ay tahay in lagu wiiqo "xoogagga dhabta ah ee muslimiinta" ee ay ka go'an tahay in dalka laga dhiso "dowlad dhab ah oo Islaami ah".[54] Sida ay aaminsanaayeen, doorashada Sheikh Shariif iyo

---

[49] Sida muuqataAl-Shabaab waxay haatan sameysatey *waaxda kahortega shirkiga*, taas oo hawsheedu tahay inay burburiso qubuuraha Suufiyadda iyo qubuuraha dadka barakeysan ee ku dhex yaala masaajidada. Ololahan waxay ka bilowdeen Dooxada Jubba, gaar ahaan magaalada Kismaayo, dhamaadkii sannadka 2008 kadibna waxay ku sii baaheen Muqdisho. Mid ka mid ah qubuuraha Suufiga ee la burburiyey waxaa uu ku yaalaa waqooyiga Muqdisho, waxaana ku aasnaa wadaad caan ah, Sheikh Maxamed Biyamaalow, kaas oo taageerayaashiisu ay sannad walba halkaa ku qabtaan xaflado lagu xusayo ama siyaaro, soona jiidata dad badan oo halkaa ku cibaadeysta. Horaantii sannadka 2006, markii Maxkamadaha Islaamiga ay awoodda gacantooda ku jirtey, dadkaasi taageerayaasha ah waa loo oggolaa inay masjidkaasi isugu yimaadaan, iyadoo rag dhowr ah oo hubeysan halkaasi uu u diri jirey Sheikh Shariif oo markaa maxkamadaha hoggaaminaye, si ay amniga u sugaan.

[50] Waxaa uu gacan ka helayey Eritrea. Eeg "Report of the Monitoring Group on Somalia pursuant to Security Council resolution 1853 (2008)", S/2010/91, 10 March 2010, pp. 21-22.

[51] Cayrow waxaa lagu diley weerar gantaal oo ay geysteen Mareykanka 1dii bisha May 2008.

[52] Sheikh Xaashi oo reer Puntland ah (waxaa reerkiisa ay deggan yihiin Garowe), qiyaasta da'diisa waxaa uu ku jiraa 50meedyo sanno amaba nin haatan ku jira qebta hore ee da'da 60damaadka. Waa xubin caan ah oo ka tirsanaa al-Ittihaad, isla markaana qeyb ka ahaa kooxdii ARS-Asmara. Waxaa uu wakiil uga ahaa Sheikh Aweys wadahadaladii Yemen ka dhacey dhamaadkii 2008da, kuwaas oo looga gol lahaa in lagu dhexdhexaadiyo labadii garab ee ururka ARS. Wareysi ay qaadey hay'adda Crisis Group, Nairobi, January 2010.

[53] Sheikh Cabdullaahi Axmed Cumar, waa xoghayaha saadka ee ururka Xizb al-Islam. Waxaa u ku dhashey degaanka Buq Aqable, oo ka tirsan gobolka Hiiraan, bartamaha Somalia, sannadkii 1963, Waxaana uu sarkaal dhinaca saadka qaabilsan ka ahaa wasaaradda gaashaandhigga 1980aadka, waxaana uu ganacsade noqdey 1990aadka, isagoo markaasi madax ka ahaa ururo samafal Islaami ah oo ka dhisnaa gobolka Hiiraan iyo Muqdisho. Wareysi ay qaadey hay'adda Crisis Group, Nairobi, January 2010. Beesha Gaal Jecel waxay ka mid tahay beelaha hoostaga beelweynta Hawiye.

[54] Wareysi ay qaadeyC risis Group, Nairobi, December 2009.

taageerada hagar la'aanta ee reer Galbeedka u muujiyeen iyagoo taa ku saleynaya mowqifkiisa "qunyar socodnimada" waxay ahaayeen kuwo aan daacad laga ahayn - ahna siyaasad shaki uu ku jiro oo loogu talagaley in la sii wado xaaladdii weligeedba jirtey ee looga soo horjeedey dhaqdhaqaaqa muslimiinta.[55]

Aweys waxaa uu Muqdisho ku laabtey dhamaadkii bishii April 2009. Waxaa isla markiiba uu hor kacey dhaqdhaqaaq looga soo horjeedo Sheikh Shariif, waxaana uu soo abaabuley weeraro aan si wanaagsan loo qorsheyn, balse aad u darnaa oo lagu qaadey ciidamada dowladda KMG bishii May. Talaabadani waxaa fududeeyey isbaheysigii dhinaca farsamo ee uu la lahaa Al-Shabaab, gaar ahaan xubno aad u tababaran oo ay ku dheer tahay fikradda jihaadka, oo ka koobnaa dagaalyahano Soomaali ah iyo kuwo shisheeye oo ku xeereysnaa Godane.Markii ay arkeen xaddiga iyo heerka uu gaarsiisan yahay weerarka ay isku soo bahaysteen Al-Shabaab iyo Xizb al-Islam ,xoogagga nabad ilaalinta Midowga Afrika, AMISOM waxaa qasab ku noqotey inay dagaalka ku soo biiraan si ay u badbaadiyaan Dowladda KMG, si aaney cimri deg deg ugu dhicin amaba dhaqso xukunka looga tuuro. Iyagoo adeegsanaya xirfadahooda aadka u sareeye iyo hubka ay haystaan, ciidamada AMISOM waxay degdeg u caabiyeen weerarkaasi, isla markaana ay qasaare balaaran u geysteen mucaaradka.

### 1. Colaada Xizb al Islam iyo Al-Shabaab

Xiriirka dhanka farsamo iyo wax wada qabsi ee u dhexeeyey Xizb al-Islam iyo Al-Shabaab waxaa uu xumaadey isla markii ay ku guuldareysteen weerarkii bishii May 2009. Xubnaha ugu muhiimsan Al-Shabaab, oo ay ku jiraan Godane iyo Shongole, waxay ku eedeeyeen Aweys iyo Turki inay ku riixeen in lagu taageero olole milateri oo aan si wanaagsan la isugu soo dubaridin, kaas oo sababey in qasaare balaaran uu soo gaaro, AMISOM ay soo dhex gasho, isla markaana sababey in shacabka ay kalsoonidii ay ku qabeen Islaamiyiinta uu dhaawac soo gaaro amaba wiiqmo.[56]

Horaantii bishii October 2009, khilaaf muddo dheer soo jiitamayey oo ka aloosnaa magaalada dekedda leh ee Kismaayo ee koonfuurta Somalia, kaas oo u saleysnaa sida loo qeybsanayo dakhliga ka soo xerooda dekedda, iyo sida magaalada loo maamulayo, iyo weliba xafiltan u dhexeeyey qabaailka Ogaadeen, Mareexaan iyo Harti, ayaa waxaa uu isu rogey dagaal buuxa oo loogu hardamayo hanashada awoodda magaalada. Raas Kaambooni, oo ka baqayey in la gooniyeeyo isla markaana aysan lumin taageerada Ogaadeenka, waxay degdeg isu geeyeen xoog kooban oo ka hortaga Al-Shabaab. Taliyaha Raas Kaambooni Axmed Madobe waxaa uu kaalmo weydiistey kooxaha kale ee Xizb al-Islam ka tirsan, sida Caanoole iyo Jabhatul Islam, laakiin waa lagu gacan seyrey.[57] Talaabo ay xaaladda ku soo farageliyeen Sheikh Aweys iyo xubno kale oo looga gol lahaa in hardankaa lagu joojiyo ayaa guuldareystey, maleeshiyada Madoobena waxaa ka awood roonaadey xoog aad u balaaran oo Al-Shabaab ah, oo uu horkacayey Ibrahim Xaaji Jaamac Meecaad "Al-Afghani" (oo magaalada Kismaayo looga yaqaan Abubakar al-Zeylici), isagoo kaashanaya taageerada dagaalyahanada shisheeye. Al-Shabaab waxay guushaa daba dhigeen weeraro xiriir ah oo ay la beegsadeen goobaha ay sida aadka ah ugu xoogganaayeen Raas Kaambooni ee Jubbada Hoose ku yaala, iyagoo isla mar ahaantaan gacanta ku dhigey magaalooyinka Afmadow, Jilib, Jamaame iyo Dhoobley.

Dagaalka u dhexeeya kooxahan hore uu isbaheysiga uga dhexeeyey, oo weli ka holcaya degaanada ku dhow xadka Somalia ay la wadaagto Kenya, waxaa uu meesha ka saarey rajadii laga qabey in Xizb al-islam iyo Al-Shabaab ay xal u helaan khilaafkooda, dibna u unkaan isbaheysigooda, ugu yaraan xitaa mid muddo gaaban ah.[58]

---

[55] Wareysyo dhowr ah oo uu saxaafadda siiyey doorashada Sheikh Shariif kadib, Sheikh Aweys waxaa uu gacanyarihiisa hore ku tilmaamey inuu yahay"khaain" isla markaana ah "dabadhilif" fulinaya danaha Mareykanka, oo aan waxba ka duwaneyn Cabdullaahi Yusuf, oo uu jagada madaxtinimada Dowladda Federalka KMG kala wareegey. Waxaad eegtaa, tusaale ahaan, Cabdicasiis Xasan, oo ah "Somali opposition leader vows to fight on" [hoggaamiye mucaarad Somali ah oo ku dhaaranaya inuu dagaalamayo], Reuters, 5 March 2009.

[56] Wareysi ay qaadey hay'adda Group, Nairobi, December 2009. Sida muuqata Al-Shabaab waxay doorbidey inay adeegsato hab ay ku hananeyso awoodda Muqdisho oo ah inay si tartiib tartiib ah cadaadis u saarto magaalada, halkii ay dagaal fool ka fool ah geli lahayd. Wareysiyo khadka telefonka oo ay qaadey hay'adda Crisis Group, Mogadishu iyo Nairobi, December 2009.

[57] Sababaha ay ku diideen Caanoole iyo Jabhatul Islam inay gacan siiyaan Madobe waxaa laga yaabaa inay dhiirigeliyeen xafiltanka iyo kala qeybsanaanta ka dhexjira Xizb al-Islam. Ulajeedooyinka Madoobe waxay ahaayeen kuwo shaki abuuraya, waxaana dadka qaar u arkayee in qorshihiisa ku saabsan dib u qabsashada magaalada Kismaayo ay salka ku hayso isku day uu doonayo inuu ku kasbado taageerada beesha Ogaden isla markaana uu ku xoojiyo fursadaha uu jagada guddoomiyenimada Raas Kaambooni kagala wareegi karo, hoggaamiyaha da'da ah ee xanuunsanaya, Sheikh Xasan Turki. Wareysi ay qaadey hay'adda Crisis Group, Nairobi, December 2009.

[58] Inkastoo ay jiraan warar sheegaya in taliyeyaasha Soomaalida mararka qaarkood ay meel uga soo wada jeesteen ururka Ahlu Sunna Wal Jamaaca oo ah cadowga ay ku leeyihiin gobolada dhexe ee Somalia. Tusaale ahaan waxay iska kaashadeen inay dib u qabsadaan magaalada istaraatiijiga ah ee Beled Weyne intii u dhexeysey January-February 2010.

### 2. Caanoole iyo Jabhatul Islam – Isku qaabeynta qabiilka iyo aydolojiyadda

Caanoole iyo Jabhatul Islam waxaa la aasaasey horaantii sannadka 2008, waxaana ujeeddadu ay ahayd in lagu ilaaliyo danaha labada beelood ee kala ah Harti iyo Gaaljecel, iyagoo qeyb ka noqdey dhaqdhaqaaqyada mucaaradka ee ay horkacayeen Al-Shabaab.[59] Hoggaamiyeyaashooda, Sheikh Cabdullaahi Cali Xaashi (Harti, Daarood, Carab Maxamuud Saalax) iyo Sheikh Cabdullaahi Ahmed Cumar, waa kuwo fikrad ahaan aad ugu janjeera dhinaca Islaamka mayalka adag ee Al-Shabaab, waxayna xiriir dhow la lahaayeen maadxda sare, sida Godane iyo Turki, sannadadii 1990 aadka, laakiin waa shakhsiyaad si weyn u aaminsan danaha beelahooda.[60] Ujeeddada muuqatey ee ku biiritaankooda Al-Shabaab waxaa uu ahaa mid lagu muujinayey ka soo horjeedka Madaxweyne Shariif iyo dhamaan kuwa uu wakiilka ka ahaa.

Ujeeddada muhiimka ah, hase yeeshee waxay ahayd dano qabiil. Caanoole aganjada ay wateen waxaa uu ahaa inay sugaan jiritaanka danaha Harti ee koonfuurta Somalia – gaar ahaan magaalada dekedda ah ee Kismaayo. Ujeeddada Jabhatul Islamna waxay ahays inay wakiil ka noqoto danaha Gaaljecel iyo beelaha yar yar ee khatarta ay kaga imaan kartey soo ifbixidda iyo horumarka Ahlu Sunna Wal Jamaaca ASWJ ee gobolada dhexe sida Hiiraan iyo Galguduud.[61] Iyadoo hoggaamiyeyaal aad ugu nugul danaha beelaha ay ka mid ahaayeen madaxda talada haysa ee Al-Shabaab, ma aysan jirin wax shaki ah ama walaac ah.[62] Markii ay cadaatey in talada ay u wareegtey xubnaha mayalka adag ee ka soo horjeedey in la adeegsado cayaarta "qabiilka", waxay xaaladooda noqotey mid daciif ah oo aan caga badan ku taagneyn.[63] Marki Xizb al-Islam ay soo ifbaxdey bishii February 2009, Caanoole iyo Jabhatul Islam waxay u arkeen hoygooda caadiga ah iyo weliba fursad ay kaga baxsadaan xaalada cakiran ee ay ku jireen. In ay ku biiraan Xizb Al- Islam waxay au arkayeen inay tahay habka keliya ee ay ku sii xajisan karaan mowqifkooda "wax diidista" iyo inay sitaan aqoonsi jihaad, iyagoon dhanka kalena iska dhigeyn amaba ka tegeyn ajendayaashooda qabiilka ku saleysan, oo ay si taxaddar leh ugu hoos qariyeen waxa ay ugu yeereen waddaniyadda Somalia.

Habkaasi ay doorteen waxaa uu isla markiiba noqdey mid aan si wanaagsan ugu shaqeyn oo weliba ka khatar badan dhanka siyaasadda marka loo eego kii hore ay u adeegsan jireen. Hizb al-Islam waxaa awoodooda ay wiiqantey amaba hoos u dhacdey kadib weerarkii dhicisoobey ee bishii May ay wadajirka u qaadeen kooxda Al-Shabaab. Arintu waxay sii xumaatey markii kooxahaasi ood wadaagga ahaa amaba uu isbaheysiga ka dhexeeyey ay bilaabeen inay ku dagaalamaan gacan ku haynta magaalada Kismaayo, iyadoo kooxda Caanoole ay ahayd mid taag daran oo aan saameyn weyn ku lahayn inay badbaadiso beelaha Harti Daarood - sida Majeerteen iyo Dhulbahante. Isla mar ahaantaa, waxaa dhicisoobey isku day Jabhatul Islam ku dooneysey inay kaga hortagto ASWJ gobollada dhexe iyadoon ka qeyb gelin amaba aan kala tashan kooxda Al-Shabaab.

---

[59] Qiyaasaha dhinaca awoodda milateri ee labada urur waa kuwo kala duwan, walow ilaha qaarkood sheegayaan in dagaalyahanadooda marka la isku geeyo aaney ka badneyn 400. Tiradan ayaa hoos u dhaceysey tan iyo bishii December 2009, taas oo inta badan ay ugu wacan tahay goosasho ay dagaalyanadu labadan urur kaga cararayaan. Ma jiro dhul ay labadan kooxood iskood u maamulaan. Wareysi khadka telefonka oo ay qaadey hay'adda Crisis Group, Mogadishu, January 2010.

[60] Maxamed Mire (Harti Darood/Majerteen) waa taliyaha ciidamada ee Caanoole.

[61] Ururka Ahlu Sunna Wal Jamaaca (ASWJ), walow uu yahay isbaheysi ka dhexeeya taageerayaasha Suufiyada , ayaa waxaa loo arkayey sida isku day ay beelaha Habar Gidir – gaar ahaan Ceyr, Saleebaan iyo Sacad ku doonayeen – inay ku sameystaan nidaam kale oo cusub oo ay ku gaaraan danahooda isla markaana ay si tartiib tartiib ah uga guuraan hab dhaqameedkooda soo jireenka ah ee ay kaga soo horjeedeen Dowladda Federalka KMG ah.

[62] "Xubnaha fuliya siyaasadda" Al-Shabaab, oo iyagu doorbidey in si weyn loola macaamilo hoggaamiyeyaasha beelaha, waxaa horkacayey Robow, kaas oo khibrad weyn u lahaa sida loola xaajoodo madaxda beeleha. Tani waxay qeyb ahaan sharaxeysaa sababta uu weli dadka uu ka dhashey ee beelaha Raxanweyn iyo xitaa odayaasha Hawiye ee Muqdisho uu ka yahay amaba loo arko nin caan ah amaba macruuf ah.

[63] Fikirka looga soo horjeedo ku dhaqanka qabiilka ee ka dhex jira Al-Shabaab waxaa horsed u ah Amiirka kooxda, Godane, waxaana la wadaaga dhowr xubnood oo xagjir ah, sida Shongole iyo al-Afghani, oo aaminsan in Jihaadiga Salafiga ee dhabta ah uu yahay kan ka fogaada nidaam walba oo ku dhisan "qabiil". Dhibaatada ugu weyn ee xubnaha fikirkan u ololeynaya ay ka sheeganayaan Robow waxay tahay inuu yahay "nin qabiilka aaminsan" Dhamaadkii sannadka 2008, markii ciidamada Ethiopia ay ku dhawaaqeen inay doonayaan inay isaga baxaan Baydhabo, madaxda beelaha Digil iyo Mirifle waxay ergo u dirsadeen Robow si uu ula wareego magaalada, si doorka sugidda amaanka ee marnaanaya aanu u sababin dagaal xooggan oo kooxaha u dhexeeya. Robow sidaa ayuu yeeley, waxaana uu isla mar ahaantaa badbaadiyey oo uu u oggolaadey inay si nabad leh ku baxaan qaar ka mid ah xubnaha baarlamanka iyo wasiirada ka soo jeeda qabiilkiisa. "Khaladkani" waxaa uu ka careysiiyey Godane, waxaana uu taa ka dhigtey "cadeyn" ah in Robow yahay nin qabiilka aaminsan amaba ku dhaqma. Markaa kadib ayay kulmeen waxaana dhex marey "muran aad u xooggan" oo ku saabsan xaaladaasi iyo arimo kale intaba. Godane waxaa uu dhacdadaasi u adeegsadey inuu sabab uga dhigo inuu Robow ka qaado xilka afhayeennimada ururka. Wareysi khadka telefonka oo ay qaadey hay'adda Crisis Group, Baidoa, Nairobi, January 2010.

Warar aan la xaqiijin ayaa sheegaya in labadan kooxoodba ay si tartiib tartiib uga faraxalanayeen koonfuurta iyagoo u sii dhaqaaqaya dhanka waqooyi, sida gobolada Hiiraan, Galguduud iyo Mudug.[64] Dadka qaar ayaa waxay isla dhex marayaan inay kooxahan raadinayaan kooxo cusub oo ay isbaheysi hor leh la sameystaan.[65] Iyadoo talaabadan loo arki karo mid macquul ah oo dhici karta, ayaa waxaa dhanka kale suuragal ah inay doonayaan inay beelahooda dib ula sameystaan xiriiro amaba ay doonayaan inay helaan hab cusub oo ay ku noolaadaan amaba cid wax siisa oo taageerta.Ilaa iyo haatan waxay dhinac iska dhigeen dagaalka dhexdooda iyo ku tartanka awoodda ee halakeeyey asxaaabta ay ku wada jireen dhaqdhaqaaqa Islaamiga, laakiin tani way ka hooseysaa wax lagu tilmaami karo maamul wanaag marka la barbardhigo calaamadaha midnimada iyo qaab dhismeedka urur ay soo dhisteen goobaha beeleed ee ay maamulaan.

### 3. Raas Kamboni: Axmed Madobe iyo hardanka ciddii la wareegi lahayd ururka

Ras Kamboni waxaa bilahan dhow hareeyey hardan kulul oo dhinaca awoodda ah oo u dhexeeya xubnaha ururka. Taliyeyaasha muhiimka ah ee ururka waxay halgan ugu jiraan inay xajistaan xilalkooda iyagoo filanaya inay dhalato xaalada awoodda lagu kala wareegayo oo u muuqata mid dhici karta, kadib markii ay soo baxeen warar lagu kalsoonaan karo oo sheegaya in hoggaamiyaha da'da ah Xasan Turki uu hayo xanuun aad u daran oo uu u dhiman karo.[66] Ilaa iyo haatan ma jiro hoggaamiye cad oo xilkaasi qabanaya. Warar sii horeeyey oo soo baxaya waxay sheegayaan in Turki uu doorbidayo ninka ay qaraabada yihiin, isku reerkana ay ka soo wada jeedaan, Axmed Madoobe, ayaa noqdey kuwo aan haatan waxba ka jirin amaba meesha ka baxay. Labada hoggaamiye ayaa haatan kala leexdey oo xiriirkooda uu xumaadey. Qeybaha siyaasadda ee ay kala raaceen ayaa meesha ka saarey shakiga laga qabey inuu jiro naceyb shakhsi ah oo labada nin u dhexeeya iyo kala duwananaanshahooda siyaasadeed.

Talaabooyinka "aanu cidna kala tashan" ee uu iskii u qaadey Madoobe ee dhinaca siyaasadda iyo milateriga ahba waxay dhaliyeen in lagu dhaliilo - inuu leeyahay hami aad u balaaran oo aan xadidneyn iyo isagoo muujiyey inuu yahay shakshi fursad raadis ah, waxaana taa ugu daran iyadoo lagu tilmaamo inuu qalbi wanaagsan oo naxariis ku dheehan tahay u muujin waayey xaaladda caafimaad darro ee la soo deristey Sheikh Xasan Turki. Go'aanka uu qaatey ee uu ku weerarey magaalada Kismaayo isagoon wax talo ah ka helin xubnaha uu isbaheysiga kala dhexeeyo, ayaa waxay cadeyn buuxda u noqdeen qodobadan lagu eedeynayo. Walow Madoobe uu ku doodey in talaabada uu qaadey ay ku dhiirigelisey rabitaanka dhinaca niyadda ah oo muhiim ah si uu uga hortago kooxda Al-Shabaab, hadana kuwa ka soo horjeeda waxay aaminsan yihiin in sheegashadaasi aaney wax micne ah ku dhisneyn. Xubnahaasi ka soo horjeeda waxay rumeysan yihiin in Madoobe uu cayaarayo hab qabiil ku dhisan, isagoo isku diyaarinaya inuu noqdo ninka labaad ee ugu xooggan qabiilka Ogaadeenka, isla markaana uu iska dhigo ninka ilaalinaya danaha qabiilkiisa ee gobollada Jubbooyinka. Talaabadani waxay ka dhigan tahay khiyaano ka dhan ah mabaadi'da Islaamiga iyo fikradaha Somali weyn ee ururka Xizb al-Islam abuurey. Shakiga ay qabaan Turki iyo xubnaha ay shurakada yihiin waxaa uu colaad muuqda isku beddeley dhamaadkii 2009, markii ay soo baxeen warar sheegaya in Madoobe u si hoose ula xaajoonayey Dowladda Federalka KMG iyo saraakiisha Kenya.[67]

*Kenya iyo Sheikh Axmed Madoobe*

Dowlada Federalka KMG ee Somalia oo ku guuldareysatey inay hanato Sheikh Madoobe iyo sugitaankeeda badan ma noqon mid ka niyad jebisa Kenya inay la macaamisho amaba ay isbaheysi la sameysato (Madoobe).[68] Siyaasadda dowlada Kenya ee

[64] Wareysi khadka telefonka oo ay qaadey hay'adda Crisis Group, Nairobi, January 2010.

[65] Wareysi yo khadka telefonka oo ay qaadey hay'adda Crisis Group, Bosaaso iyo Nairobi, January 2010. Caanoole waxaa la sheegayaa inay fariimo u direen taliye hore oo Al-Shabaab ka tirsanaa, Sheikh Maxamed Saciid "Atom", kaas oo sida lagu soo waramayo ka hawlgala qeybo ka tirsan gobolka Bari oo ka tirsan degaanada Puntland, gaar ahaan goobaha ku xeeran buuraha Galgala (Galgalato). Shiikha oo ka soo jeeda beesha Warsangeli (oo ka mid ah beelaha Harti Daarood), waxaa la sheegayaa inuu xeryo ku leeyahay buuraha, halkaasina uu ku haysto ciidamo gaaraya 300. Maamulka Puntland waxaa uu dhowaanahan isku dayey inuu wadahada la yeesho Sheikh Atam. Wlararka qaarkood ayaa sheegaya in xubno ka tirsan sirdoonka Mareykanka ay tageen Puntland si ay u soo xaqiijiyaan arrimahan iyo waxa uu damacsan yahay Atam. Eeg "Garowe: Sirdonka USA ayaa soo gaadhay", Dayniile, 16 February 2010.

[66] Wararka ku saabsan inuu xanuunsanayo Sheikh Xasan Turki ayaa in muddo ahba la isla dhex marayey. Xanuunka dhabta ah e e haya ilaa haatan lama oga, balse ilaa haatan waa wax uun la iska qiyaasayo.Wararka qaar ayaa sheegaya in qeyb ka mid ah xubnaha muhiimka eee jirkiisa uu shaqadii gabay. Wareysiyo khadka telefonka oo ay qaadey hay'adda Crisis Group, Mogadishu iyo Nairobi, January 2010.

[67] Wareysi ay qaadey hay'adda Crisis Group, Nairobi, November 2009.

[68] Dhamaan talooyinka iyo yabooha uu sameeyey Madoobe waa lagu gacan seyrey. Xubno ka tirsan Dowladda Federalka KMG ayaan diyaar u ahayn inay awoodda ka tanaasulaan, iyagoo markaa muujiyey inaaney aaminsaneyn Madoobe, waxayna ku doodeen in heshiis lala galaa aanu faaido badan dhali karin.

ku aadan Somalia ayaa sannadkii 2010ka si la yaab leh isu bedeshey. Indhaha oo laga qabsado, dhayalsi amaba in si tartiib ah loola macaamilo Al-Shabaab waxay noqotey siyaasad laga tegey. In kooxda Al-Shabaab la xakameeyo waxay haatan noqotey umuur muhiim ah oo amaanka qaranka ku saabsan. Ilaa iyo haatan faahfaahinta wararkaasi waa kuwo sir qaran ah, laakiin qeyb ka mid ah waa dhinaca militeriga. Ilaa iyo 2,500 oo dhalinyaro Soomaali ah oo ka soo jeeda labada dhinac ee xuduudda labada dal (Somalia iyo Kenya) ayaa la qorey tababarna la siiyey, waxayna diyaar u yihiin in la geeyo goobaha dagaalka ee Somalia si ay koonfuurta Somalia uga barbar dagaalamaan ciidamada Dowladda Federalka KMG.[69]

Haddii ay taa dhacdo, Kenya waxay khatar ugu jirtaa inay si weyn faraha ula gasho colaadda Somalia. Xaqiiqdiina, Al-Shabaab waxay bilahan dhow jeedisey hanjabaado dhowr ah inay weeraro argagixiso ka geysan doonto Kenya, Kenya, Uganda, iyo Burundi.[70] Ra'yiga ayaa kala qeybsan ku saabsan in kooxdan ay hawlgaladeeda ku baahin doonto gobolka intiisa kale, iyadoon khatar gelineyn mashruuceeda siyaasadeed, taas oo dhalin karta in shacabku ay ka hor yimaadaan, isla markaana ay horseeddo inay soo dhoweystaan in lagu ugaarsado goobaha ay ku dhuumaleysanayaan iyo shabakadahooda intaba.[71] Dowladaha reer galbeedka, ee ka shakisan in Kenya ay faraha la galeyso mushkiladda Somalia, waxay si gaar aah ugu taliyeen in taxaddar la muujiyo, iyagoo u muuqda kuwo aan la dhacsaneyn taageero loo fidiyo qorshahan.[72] Kenya kuma filna inay hawlgeliso ciidan sidaa u balaaran, iyadoon taageero ku filan ka helin dalalka reer Galbeedka ee uu isbaheysiga kala dhexeeyo, taana haatan uma muuqato mid dhici karta. Marka dhan loo eego, ciidamadan waxay noqon doontaa in si rasmi ah loogu wareejiyo Dowladda Federalka KMG amaba in lakala diro.[73]

*Ras Kamboni iyo ku soo laabashada Al-Shabaab*

Go'aanka xubno ka tirsan Ras Kamboni ay ugu laabteen Al-Shabaab, sida weyna ay u tebiyeen qalabka warbaahinta horaantii bishii February, waxay dad badan ku noqotey la yaab.[74] Go'aanka waxaa uu ahaa mid marka si loo eego aan lagu kala qeybsaneyn. Waxaa la sheegayaa in Xasan Turki uu ansixiyey heshiiska, laakiin waxaa jira shaki ku saabsan arintan, marka loo eego xaaladiisa xun ee caafimaad. Barre Cali Barre, oo taliye muddo dheer iyo saaxiib soke oo Sheikh Xasan Daahir Aweys. Ayaa naqdiyey wararkaasi, waxaana uu ku tilmaamey "warar aan lagu qanci karin iyo wax ka shaqeynaya danaha cadowga".[75]

## 4. Dhamaadkii Aweys?

Aweys waxaa laga yaabaa inuu horey ugu wanaagsanaa isku dhex darka aydolojiyada diinta iyo danaha qabiilka, maantase waxaa si weyn loo arkaa mid aan sidaa muhiim u ahayn, gaar ahaan marka la eego siyaasadda beeleed ee Cayr, oo ah beesha uu ka dhashey.[76] Hoos uu dhaca

Wareysi ay qaadey hay'adda Crisis Group, diblomaasi reer Gelbeed ah, Nairobi, March 2010.

[69] Eeg "Report of the Monitoring Group on Somalia", op. cit., p. 54.

[70] Cabdi Guuleed iyo Ibraahim Maxamed, "Waa inaan dadkooda ka oohinaa!", Reuters, 23 October 2009. Khubarada dhinaxa amniga waxay isku waafaqsan yihiin in kooxda maleeshiyada Somalia ay leeyihiin awood ay hawlgalo argagixiso uga fuliyaan dalka Kenya iyo xitaa meelo ka fog.

[71] Soomaalida reer Kenya ee tiradoodu badan tahay iyo xadka sida sahlan looga soo gudbo ee Kenya la leedahay Somalia ayaa waxay ka dhigtey saldhig weyn oo kooxaha hubeysan ee Somalia ay leeyihiin. "Report of the Monitoring Group on Somalia", op. cit., pp. 24-26.

[72] Wareysi ay qaadey hay'adda Crisis Group, Nairobi, March, 2010.

[73] Arintani waxay walaac ka dhalisey Ethiopia oo ka cabsi qabta in maamul ay Ogaadeenka ka taliyaan uu ka soo if bixi karo koonfuurta Somalia, kaas oo marka damba taageeri doona kooxda ay isku beesha yihiin ee Ogaden National Liberation Movement ee ka dagaalanta gudaha Ethiopia. Si looga hortago shakigaasi iyo walaaca la qabo ayaa ciidamadan la uruuriyey waxaa qeyb looga dhigey ciidamo ka soo jeeda beesha Mareexaan, laakiin ma cadda sida awoodda loo qeybsanayo iyo waxa ay taasi ka dhigan tahay haddii xoogagan ay maamul goboleed ka dhistaan Somalia.

[74] "Ururkii Raas Kamboni oo ku biirey Al-Shabaab", Somalikudhan, 2 February 2010, http://somalikudhan.com/detail.asp?nid=1697. Waxaa xubnahaasi ka mid ah Maxamed Maxamuud Cali "Dhul Yadayn", Kaboje'ed Iyo Ciise Kamboni. Eeg "Report of the Monitoring Group on Somalia", op. cit., p. 16. Maxamed Dhul Yadayn oo loolan awoodeed kula jira Axmed Madoobe, iyagoo ku hardamaya hoggaaminta kooxaha Islaamiyiinta ee beesha Ogaadeen ka soo jeeda.

[75] Barre Cali Barre waxaa soo direy Sheikh Xasan Turki isagoo ay wehliyaan 150 nin bartamihii 2008 si ay ugu biiraan jihaadka ka socda Muqdisho. Waxaa uu ka barbar shaqeeyey kooxaha kale ee Al-Shabaab, laakiin waxaa uu xiriir dhow la lahaa Aweys, waxaana lagu diley suuqa Bakaaraha 9kii bisha March, 2010. Waxaa jirta aragti sheegeysa in ay dileen xubno ka tirsan kooxda Al-Shabaab iyo Ras Kamboni, kuwaas oo dhowaan kaga dhawaaqey heshiis ay ku gaareen magaalada Baydhabo. Aragtida kalena waxay leedahay, waxaa diley xubno u arkey inuu caqabad ku yahay damaca la wareegidda maamulka kooxda Ras Kamboni, gaar ahaan xubnaha isbaheysiga la leh Madoobe.

[76] Wareysiyo khadka telefonka oo ay qaadey hay'adda Crisis Group, Mogadishu, iyo Nairobi, January 2010. Qaar ka mid ah hoggaamiyeyaasha beesha Hawiye waxay Sheikh Xasan Daahir Aweys ku eedeynayaan inuu ku dhaqmayo madax adeyg iyo inuu mar walba muran iyo iska hor imaad dadka kala hor yimaado, taasina loo aaneynayo inay tahay caqabada hor taagan inuu heshiis la gaaro Dowladda Federalka KMG. Waxaa u leeyahay dabeecad uu isku muujiyo inuu yahay nin mayal adag, taasina waxay mararka qaar sababtaa in khubarada arrimaha

mansabkiisa qaran ayaa waxay muujineysaa doorka aan muhiimka ahayn ee uu ku leeyahay beesha Cayr iyo siyaasadda beel weynta Hawiye. Hoggaamiyeyaal dhalinyar isla aad u firfircoon oo ka soo jeeda beesha Cayr, sida ku-xigeenkii hore ee raisul wasaaraha, Axmed Cabdisalaam, ayaa soo baxay. Dad badan oo beesha ka soo jeeda oo deggan gobollada dhexe ee Galguduud iyo Hiiraan ayaa iyaguna si wey u taageera ururka dowladda raacsan ee Ahlu Sunna Wal Jamaaca.

Aweys waxaa uu noqdey nin si buuxda ugu tiirsan ninka uu sida aadka ah ay isugu dhow yihiin, gacanyarahana u ah, Dr. Cumar Iimaan Abuubakar, si uu hawlgalada ururka Xizb al-Islam u sii wado. Markii uu arkey culeyska kaga imanaya Yuusuf Indha Cadde (Habar Gedir/Cayr/ Eji),[77] Xilka Cumar Iimaan waxaa uu u muuqdaa mid sugan. Hase yeeshee mustaqbalka guud ee Xizb al-Islam waxaa uu u muuqdaa mid mugdi badan uu hareeyey. Dhibaatooyinka weyn ee siyaasadeed ee haatan haysta waxa weeyaan dib u dhiska awooddeeda siyaasadeed kadib markii ururka Raas Kaambooni uu isaga baxay bishii February 2010, iyo inuu ka dhaadhiciyo labada urur ee kale ee isbaheysiga ku jira ee Caanoole iyo Jabhatul Islam – inay ku sii baaqi ahaadaan isbaheysiga.

Si kastaba ha ahaatee, waxay noqoneysaa arin lagu degdegey haddii la gooniyeeyo amaba la iska fogeeyo Aweys, oo weli awood u leh inuu dhibaateeyo Shariif iyo Dowladda Federalka KMG.[78] Bishii May, Xizb al-Islam waxay la wareegeen magaalada xeebta ah ee Xarar-Dheere, oo ah magaalo caan ah oo ay gabbaad ka dhigtaan burcad badeedka. Walow kooxdu ay sheegtey in ujeeddada ka dambeysa qabsashada magaaladaasi ay tahay inay wax ka qabtaan burcad badeedka, isla markaana ay ku so rogaan shareecada Islaamka, hadana hadafka dhabta ah waxaa uu ahaa in la muujiyo in Aweys uu awoodo inuu soo celiyo sharciga iyo kala dambeynta, isla mar ahaantaan uu weli yahay nin muhiim ah. Xizb al-Islam waxaa kaloo uu isku dayayaa inay awoodooda ku balaariyaan magaalada Afgooye, oo ku taala meel dibedda ka ah Muqdisho, iyo degmooyinka ku xeeran.

Waxaa khasab ah in la helo nidaam lagu dhaqancelinayo amaba lagu xakameeyo, iyadoo aaney muhiim ahayn in awoodiisa la xoojiyo.[79] Fursadaha jira ee lagu xakameyn karo waxaa ka mid ah in hawlgab laga dhigo amaba loo masaafuriyo dalka Boqortooyada Sacuudi Caraabiya, iyadoo la raacayo nidaam caadi ah oo "lana soo afjaro cambaareynta iyo gooniyeynta" ay ku soo rogeen Mareykanka iyo Qaramada Midoobey. Hoggaamiyeyaasha Cayr waxay u arkaan Aweys inuu yahay shakhsi dhibaato ku ah, waxayna ka daaleen mowqifkiisa adag, laakiin marka si guud loo eego, badi waxay soo dhoweyn doonaan talaabooyin kasta oo lagu xakameynayo amaba lagu dhaqancelinayo.[80]

## C. AHLU SUNNA WAL JAMA'A (ASWJ) IYO DOWLADA FEDERALKA KMG

Ururka ASWJ waxaa la aasaasey sannadkii 1991 si uu meel isugu keeno hogaamiyeyaasha dhaqameed ee Suufiyada Islaamka, talaabadaas oo ahayd isku day la doonayey in la isaga caabiyo sare u kaca kooxaha Islaamiyiinta ee mayalka adag, laakiin waxaa uu lahaa awood kooban oo milateri ilaa laga soo gaaro bartamihii -2008.[81] Bishii July ee sannadkaasi, waxay si kastaba ha noqotee, uu dagaal dhex marey ururka iyo kooxda Al-Shabaab, iyagoo ku dagaalamey goobo Al-Shabaab ay isku deydey inay ka mamnuucdo ku dhaqanka caqiidooyinka Islaamka Suufiyada.Bishii December, ASWJ waxay taageero milateri ka heleen Ethiopia,

---

Somalia faaleeya ay ku tilmaamaan inuu yahay nin ka xagjirsan sida uu dhab ahaantii yahay. Laakiin in keligii dusha loo saariyo eedda ah inuu ku guuldareystey heshiis uu la gaaro Madaxweyne Shariif waa arin aan cadaalad ku dhisneyn. Wadahadaladii ka dhacey Khartoum bishii April 2010 ee lala yeeshey Dowladda Federalka KMG waxay ahaayeen kuwo si wanaagsan aan loo maamulin. Dowladda KMG wax cad uma yaboohin Aweys oo ay ugu balanqaadayaan in magaciisa "laga saari doono liiska argagixisada". Waxaa kaloo jirey dano waaweyn oo shisheeye oo ay lahaayeen - Mareykanka, Ethiopia iyo Ingiriiska - oo doonayey inaan Sheikh Aweys wax dhaqan celin ah lagu sameyn, taasina ay dhalin kartey in la wiiqo dadaalka dhex dhexaadinta ee ay waddamada Carabta garwadeenka ka ahaayeen sida (Masar, Qatar iyo Sacuudi Caraabiya).

[77] Indha Cadde, oo hadda ah wasiiru dowlaha difaaca, ayaa ka goostey mucaaradka kuna biirey Dowladda Federalka KMG, kadib markii lagaga awood roonaadey loolan dhanka awooda ah oo kala dhexeeyey Cumar Iimaan bartamihii 2009.

[78] Waxyaabaha ka caawin kara Aweys haddii uu isku dayayo inuu hagaajiyo mustaqbalkiisa siyaasadeed waxaa ka mid noqon kara: heshiis uu la galo Madaxweyne Shariif; kala qeybsaanaan xooggan oo soo wajahda ASWJ, taas oo dhalin doonta in xubno aad u farabadan oo beesha Ceyr ka soo jeeda ay dib ugu soo laabtaan mucaaradka; iyo qalqal Al-Shabaab dhexdooda ah oo keeni kara in awoodda ay ku wareegto dagaalyahanada waddaniga ah oo haatan uu loolan awoodeed kala dhexeeyo jihaad doonka shisheeye.

[79] Hirka ayaa waxaa uu ku soo jabey Aweys kadib markii weerar balaaran oo dowladda ka dhan ah, oo uu soo abaabuley uu dhicisoobey. Xubno badan ayaa ku eedeeyey in taladiisa ay xumeyd, si xunna u abaabuley weerarkaasi oo waxa ku dhiirigeliyey uu ahaa "dantiisa shakhsiyadeed" oo uu doonayey inuu Shariifka ugu dhigo cashar iyo inta ay la'eg tahay awoodda uu wax ku haleyn karo. Odeyaasha beelaha waxay ku eedeeyeen inuu sabab u ahaa waxyeelo dheeri ah oo soo gaartey dadka rayidka ah. Waxaa loogu deeqi karey lacag wanaagsan oo uu hawlgab ku noqdo, lana mid ah tan Cabdullaahi Yuusuf.

[80] Wareysiyo khadka telefonka oo ay qaadey hay'adda Carisis Group, Mogadishu iyo Nairobi, December 2009.

[81] Eeg Crisis Group Report, *Somalia's Islamists*, op. cit., pp. 15-16.

waxayna bilaabeen olole ay xididada ugu siibayaan Al-Shabaab. Dhamaadkii 2009, waxaa ururka uu noqdey awoodda ugu balaaran ee isbaheysi la leh Dowladda Federalka KMG, dhanka koonfuureed iyo bartamaha Somalia intaba.[82]

ASWJ waxaa intiisa badan uu ka kooban yahay isbaheysi qabiil oo ay hoos yimaadaan beelaha Hawiye ee dega gobollada dhexe ee Hiiraan iyo Galguduud. Beesha ugu weyn ee hormuudka ka ah ololaha milateri iyo kan siyaasadeed ee ururka waa Habar Gedir/Cayr. Beelaha Sacad iyo Saleebaan ayaa iyaguna si weyn ugu soo biiraya ururka. Waxaa kaloo xubno ka ah beelo aan ka soo jeedin Hawiye, waxaana kuwa ugu caansan ka mid ah Mareexaan (Gobolka Gedo), oo ka mid ah beelaha Daaarood oo colaad taariikhi ah ay kala dhexeysey Hawiye. Maleeshiyada kale ee ASWJ waxay ka hawlgalaan bariga Galguduud iyo Shabeellaha Dhexe (Abgaal Waceysle) Iyo gobolka Hiiraan (Xawaadle).[83] Hoggaamiye kooxeedyada qaar sida Barre Aden Shire "Hiiraale" (Mareexaan) iyo Yuusuf Axmed Xagar "Dabageed", waxay isku dayeen inay sheegtaan xubin inay ka yihiin ASWJ si ay u soo jiitaan taageerada gudaha iyo tan caalamka.[84]

Isbaheysiga beelaha waxaa ka dhigaya mid aad u firfircoon, sida ay ku doodeyso ASWJ, naceybka loo qabo Islaamnimada xagjirka ah ee ay baahinayaan Al-Shabaab iyo difaaca caqiidada dhaqameed ee Islaamka Suufiga ah. Sidaa ayaa laga yaabaa inay tahay, laakiin xisaabtanka beeleed iyo midka dhuleed ayaa isna loo arkaa inuu dhiirigelinayo. Sheikh Cumar Maxamed Faarax, oo ah wadaad ka soo jeeda degmada Caabud Waaq, ayaa ah madaxa guud ee aan la isku haysan ee ururka, hase yeeshee waxaa rasmi ahaan loogu yeeraa inuu yahay uun hoggaamiyaha ururka ee gobollada dhexe. Ururka ma laha qaab dhismeed habeysan, waxaa hareeyey kala qeybsanaan beeleed, isagoo u muuqdaa mid aan lahayn hoggaan karti leh iyo jiho toona. Kala qeybsanaan ma ahan arin haatan laga fursan karo kadib markii heshiis awood qeybsi uu ururka la saxiixdey Dowladda Federalka KMG, hanaankaas oo horseedi kara inay jiraan kuwo ka manaafacaada iyo kuwo aan waxba ka helin.

Qiyaasaha ku saabsan awoodda milateri iyo tan siyaasadeed ee ASWJ way kala geddisan yihiin. Tirada dagaalyahanadooda waxaa lagu qiyaasaa ilaa 2,000, oo ku hawlgala qaab koox koox iskood u madax banaan oo ku baahsan dhulka weyn ee ku yaala bartamaha Somalia.[85] Walow aysan qabin tababar wanaagsan, iyo qalab ku filan oo tayo leh toona, niyadooda iyo xirfadahooda dagaal waa uu ka sareeyaa ciidamada Dowladda Federalka KMG. Mahad balaaran ayaa hadana loo jeedinaya, waayo Al-Shabaab waxaa haatan soo wajahay cadaadis ba'an, iyadoo hawlgalada Al-Shabaab ee goboladaasi ay ku ekaadeen isdifaacid keliya. Maamulka dhuleed ee Al-Shabaab waa mid iska dhexdhexaad ah, waxayna ku kooban yihiin qeybo yaryar oo qaabka ay u xajisteen ay daciif tahay. Dhowaan waxaa laga qabsadey magaalada istaraatiijiga ah ee Beledweyne markii weerar wadajir ah ay soo wada qaadeen ciidamada Al-Shabaab iyo Xizb al-Islam.

Ethiopia waxay taageero balaaran oo milateri iyo saadba u fidisaa kooxda ASWJ. Walow ay talaabadni dano ku meel gaar ah lagu gaarayo, ayaa hadana waxaa dhici karta inay mustaqbalka waxyeelo la timaado. Ujeeddada ay Ethiopia leedahay waxa weeyaan inay u adeegsato ASWJ si difaac ama gaashaan ugu noqdaan gobolka amaankiisu khatarta ay ku hayso koxda Al-Shabaab, laakiin waxay dooneysaa oo kale inay ka hortagto soo ifbaxa awood weyn oo ka dhan ah amaba la xafiltami karta mustaqbalka, waxaana laga yaabaa inay taasi tahay sababta ay u dooneyso inay midoobaan ASWJ iyo Dowlada Federalka KMG. Xiriirka ka dhexeeya ASWJ iyo Dowladda Federalka KMG waxaa hareeyey is aamin darro iyo aragtida ku saabsan fahamka baahida loo qabo inay hadaf ka dhan ah Al-Shabaab la yimaadaan.

Dhowr bilood kadib, dadaal ay wadajir u sameeyeen Ethiopia iyo beesha caalamka, waxaa labada dhinac bishii March 15 keeda (2010) ay kala saxiixdeen heshiis awood qeybsi ah.Heshiiskaasi waxaa uu ururka ASWJ siinaya shan xubnood oo golaha wasiirada ah, safiiro iyo in xubno sare ay ku yeeshaan booliska iyo ciidamada sirdoonka. Qaar ka mid ah xubnaha ASWJ waxay wacad ku mareen inaaney weligood aqoonsan doonin heshiiskaasi. Kooxdaasi oo ay horkacayaan xoghayaha arrimaha dibedda ee ururka, Sheikh Bashiir Cabdi Colaad, iyo saaxiibkii, Sheikh Cabdulqaadir Cabdiraxmaan (Abu-Zakariya), waxay heshiiskaa ku tilmaameen khiyaano horseedi doonta in ururka uu kala jabo ama uu burburo.[86]

[82] Kooxdahe Monitoring Group waxay ku qiyaaseysaa awoodda ciidamadan xaaladda quuska ah ku jira inay gaarayaan ilaa 2,000 oo dagaalyahanno. "Report of the Monitoring Group on Somalia", op. cit., p. 11.
[83] Ibid., p. 11.
[84] Ibid., p.12.
[85] Ibid.
[86] Eeg, tusaale ahaan, "Xubnaha Ahlu Sunna oo qaadacey heshiiska lala gaarey Dowladda Federalka KMG", Garowe Online (Garowe, Somalia), 18 March 2010.

## IV. JAWAABTA DOWLADDA FEDERALKA KMG

Dowladda Federalka KMG ma laha awood ay ugu baabac dhigto khatarka kaga imaaneysa Islaamiyiinta.Walow ciidamadeeda la siiyey tababar hufan iyo taageero milateri, hadana ciidamadaasi waxay ku kooban yihiin qeyb aad u yar magaalada Muqdisho ka tirsan,, qorshe muddo dheer ay hadal hayeen oo ah inay dagaal ba'an qaadi doonaan waxaa uu muuqdaa mid hakad galey. Dowladda waxaa kaloo ka maqan qorshe hufan oo si wanaagsan loo diyaariyey oo dib u heshiisineed, waxayna u muuqataa mid ka cagajiideysa inay wadahadal la yeelato kooxaha ku kacsan. Tan ugu muhiimsan waxay tahay, inay lumineyso kalsoonidii iyo taageeradii shacabka Soomaalida.

### A. AWOOD MILATERI OO XADIDAN IYO JIRITAAN LA'AANTA ISTARAATIIJIYAD DIB U HESHIISIINEED

Wadarta xoogga loo qoondeeyey Ciidamada Amniga Qaranka ee Somalia waxaa weeyaan 8,000 oo askari, laakiin waxaa haatan ay haysataa oo keliya qiyaastii 3,000.[87] Dowladda Federalka KMG waxaa kaloo taageera maleeshiyaad tiradoodu lagu qiyaasayo kumanaan. Heshiiskii ay dhowaan la gaartey ASWJ iyo maleeshiyada ururkaasi oo gaaraya 2,000 oo dagaalyahanno, waxaa uu si weyn sare ugu qaadey awoodda milateri, laakiin waxay ciidamadani hoos yimaadaan talis hoose oo heer goboleed ah, waxaana hadafkooda ugu weyn uu yahay la dagaalanka Al-Shabaab iyo Xizb al-Islam ee ku sugan gobollada dhexe ee Somalia.

Guud ahaan sektarka dhinaca amaanka ee Dowladda Federalka KMG ee Somalia waa mid aan lahayn qaab dhismeed, isku dubarid iyo hanaan maamul oo shaqeynaya. Qiimeyn caalami ah oo la sameeyey waxaa lagu sheegey in "dhaqanka, qaabka fikirka iyo dabeecadaha 'maleeshiyada' uu weli baaqi ku yahay ciidanka qaranka dhexdiisa".[88] Tababarada ay bixinayaan AMISOM iyo hay'adaha kale ee caalamiga ayaa ku guuldareystey inay caqabadahani xal u helaan. Dowladda Federalka KMG waxay awoodi weysey inay mucaaradka ka qabsato isla markaana ay xajisato qeybo badan oo ku yaala Muqdisho. Awoodeeda oo kooban awgeed, weerar kasta oo ay damacsan tahay inay qaaddo mustaqbalka waxaa uu noqon doona mid ay dhul aad u yar ugu qabsato si tartiib tartiib ah.[89]

Dowladdu waxay kaloo la'dahay istaraatiijitad cad oo ku wajahan dib u heshiisiinta, umana muuqato mid diyaar u ah inay wada xaajood la sameyso kooxaha kale ee ka soo horjeeda. Walow ay jireen xaalado muhiim ah oo ay maleeshiyada iyo madaxdooda uga so goosteen kooxaha mucaaradka, tusaale, Yuusuf Indha Cadde oo ka mid ahaa hoggaamiyeyaasha, oo soo goostey wax yar kadib markii Sheikh Shariif uu talada dalka qabtey. Tan iyo markaa dowladdu ma sameyn dadaal muuqda oo ku aadan sidii ay u soo jiidan lahayd amaba ugu dhiirigelin lahayd kooxaha inay isaga tagaan Al-Shabaab. Xitaa go'aankii la wada qaatey ee lagu caadiyeynayey isbaheysiga lala galey ASWJ waxay qaadeatey sannad wax ka badan, iyadoo dowladdu si ay heshiiskaasi uu fuliso uu cadaadis kaga yimid Ethiopia iyo qeybo kale oo ka tirsan beesha caalamka.

Waxay u muuqataa in istaraatijiyad la'aanta dib u heshiisinta ee Dowladda Federallka KMG ay salka ku hayso saddex arrimood. Tan koowaad, in awoodda la wadaago waxaa laga yaabaa inay horseeddo dowlad balaaran oo kala furfuran oo ka daciifsan tan haatan jirta. Tan labaad, wasiirada muhiimka ah waxay ka baqayaan inay wayaan kuraastooda. Tan saddexaad, quwadaha waaweyn ee reer galbeedka ee xiriirka la leh dowladda oo ka cabsi qaba in heshiis noocaasi oo kale haddii la gaaro uu sare u qaadi karo awoodda kooxaha xagjirka ah. Iyadoo ay sidaa tahay, ayaa hadana waxaan jirin xal milateri oo cad oo lagu soo afjaro colaadda Somalia. Talaabada noocaani ah dhowr jeer ayaa la isku dayey, waxaana ugu dambeysey tii xiligii madaxtinimadii guul dareysatey ee xukuumadda Cabdullaahi Yuusuf (2004-2008). Bilowgii, dowladdiisa waxay inta badan ku xanibneyd amaba ku koobneyd magaalada Baydhabo, waxaana xoogagga Midowgii Maxakamadaha Islaamka ay ku dhowaadeen inay xididada u siibaan. Waxaa u suuragashey Cabdullaahi Yusuf inuu Muqdisho soo galo markii ciidamada Ethiopia ay duulaankii ay soo qaadeen bishii December 2006 ay ku qabsadeen magaalo madaxda. Ciidamada Dowladda Federalka KMG iyo kuwii Ethiopia waxay markaasi lugaha la galeen dagaal dhiig badan ku daatey oo ay la galeen mucaaradkii Islaamiyiinta. Colaaddaasi waxay soo afjarantey markii Sheikh Shariif loo doortey madaxweyne, ciidamada Ethiopiana ay dalka isaga baxeen.

---

[87] Bishii May, AMISOM, oo maareysa taageerada dhaqaale ee deeq bixiyeyaasha ay siiyaan Dowladda Federalka KMG, waxay bixisey mushaharka dad gaaraya 3,021. Wareysi ay hay'adda Crisis Group, la yeelatey sarkaal ka tirsan AMISOM, Nairobi, May 2010. Ciidamo badan oo kuwa difaaca iyo booliska ayaa shaqada isaga tegey, sababtoo ah dowladda oo aan siin wax mushahar ah.

[88] Laga soo xigtey "Report of the Monitoring Group on Somalia", op. cit., p. 11.

[89] Wareysi ay qaadey hay'adda Crisis Group, sarkaal ka tirsan AMISOM, Nairobi, March 2010.

## B. LUMINTA QULUUBTA IYO KALSOONIDA SHACABKA

Kooxaha mayalka adag amaba xagjirka ah si weyn bay uga horeyaan Dowladda Federalka KMG ah dhanka dagaalka kasbashada quluubta iyo maskaxda shacabka. Saddexdii sanno ee la soo dhaafey, waxay muujiyeen inay khibrad weyn ku leeyihiin halgankan kasbashada maskaxda dadka. Iyagoo ka faaideysanaya duulaankii Ethiopia ay ku qabsatey Somalia, iyagoo kaashanaya dareenkii carada badnaa ee ay muujiyeen inta badan Soomaalida ay waddaniyada ku dheer tahay iyo, markii dambe ee waddamada reer Galbeedka ay taageereen Sheikh Shariif, waxay xubnaha mayalka adag awoodeen inay abuuraan xaalad cadaawad, colaad iyo shaki laga qabo Dowladda Federalka KMG ah. Gaar ahaan, dacaayadaha xooggan ee ay fidinayaan ee ay Shariif ugu tilmaamayaan inuu yahay dabadhilif u adeegaya waddamada reer Galbeedka iyo weliba inuu yahay nin khiyaameeyey halganka Islaamiga ah waxay noqdeen kuwo si weyn u dhaawacey sumcaddiisa iyo aaminaadii loo hayey intaba, waxayna taa fududeysey dadaalka kooxahan ay ugu jiraan inay dadka ku abuuraan fikradaha xagjirnimada isla markaana ay dalka gudihiisa iyo dibediisaba ka qortaan dagaalyahanno.

Dowladda Federalka KMG oo aan haysan dhaqaale iyo agab ku filan iyo iyadoon hayn xal siyaasedeed oo lagu furfuro mushkiladda, ayaa waxay horseedey inay u baabac dhigto fariinta kooxaha xagjirka ah. Tan iyo intii waqtiyadan dhow laga soo gaarayey dowladdu ma lahayn idaacad u gaar ah amaba website amaba wax la mid ah oo ay kaga hortagto dacaayadaha ka dhanka ah. Waxaa taa ka darneyd in Sheikh Shariif uu ku guuldareystey inuu ka faaideysto aqoonta balaaran ee uu u leeyahay diinta Islaamka iyo khibradiisa wanaagsan ee hadal jeedinta si uu uga hortago amaba uga jawaabo dacaayadaha ay fidinayaan Al-Shabaab.[90] Natiijadu waxay noqotey in xubnaha mayalka adag ay awood u yeeshaan inay daboolaan hadalada iyo codadka xubnaha qunyar socodka ah. Hadalweynta ugu weyn ee shacabka dhexdiisa waxaa ugu badan arrimaha kooxaha mayalka adag, ra'yiga dadweynahana waxaa qaabeeya hab ujeedooyin qarsoon leh oo keenaya in dalka gudihiisa dhalinyarada iyo dadka sida sahlan maskaxdooda loo adeegsan karo ee aan aqoonta lahayn lagu abuuro fikrado xagjirnimo ah. Waxaa iyana sidaa si la mid ah loo adeegsadaa jiilka dhalinyarada ee dalalka dibedda ku nool, siiba kuwa saykoloji ahaan aad ay u sahlan tahay in la soo jiito amaba ku sugan xaalad jahwareer ah.

Weeraro is miidaamin ah, dhaqanka shahiidnimada iyo jihaadka dadka dalalka dibedda ku nool ayaa ah natiijada dacaayadahan xooggan ee ay fidinayaan kooxaha xagjirka ah. Dowladda Federalka KMG, taageerayaasheeda Islaamiyiinta qunyar socodka ah iyo saaxibada ay ku leedahay beesha caalamka waxaa looga baahan yahay inay tixgeliyaan arrimahan marka ay dersayaan istaraatijiyadooda guud ee la doonayo in looga adkaado kooxaha Al-Shabaab iyo Xizb al-Islam, isla markaana ay soo afjaraan dabciga is mahdinta ee aan niyadda saafiga ah ku dhisneyn loona rogo halgan dhanka aydolojiyadda amaba fikirka ku saleysan. Dowladdu waa inay xoogga saartaa, maankana ku haysaa in xagjirnimada lagu baahinayo dadka ay salka ku hayso waxyaabo badan oo ku cusub Soomaalida, iyo tarjumaadda quraanka iyo diinta oo ku saleysan afkaarta mayalka adag. Habka xaaladan loola tacaalayey waxay ahayd in laga fogaado ka hadalkeeda, iyadoo si khaldan loo aaminsanaa inay kicin karto dagaal ku saleysan mad-habta diinta, isla markaana ay ka careysiin karto bulshada Carabta iyo waddamada ay suuragalka tahay inay kaalmo dhaqaale u fidiyaan Somalia, gaar ahaan Sacuudi Caraabiya. Halhayska Dowladda Federalka KMG ee jiritaanka hal nooc oo Islaam ah ma ahan mid xaqiiqda ku saleysan. Waxaa jira qeybo badan diinta Islaamka ah, laakiin walaaca ugu weyn waxaa uu yahay, sida colaadda ku dhisan ee loo buunbuuniyey, iyo dhibaatada jirta waxay dhalisey fikrad ama aydolojiyad jihaad ah oo ku dhisan burbur iyo dulqaad la'aan, taas oo hurisa isla markaan adkeyneysa xasaradda dalka ka aloosan. Isla mar ahaantaa, waxaa iyana shardi ah in meel loo helo xubnaha Wahaabiga ee qunyar socodka ah, si ay nabad ugu wada noolaadaan dadka kale ee aaminsan mad-habta kale ee diinta Islaamka.

Hawsha ugu weyn ee hortaala Dowladda Federalka KMG iyo dowladaha dalalkooda ay ku nool yihiin bulshada Soomaalida waxay tahay inay dhaqan celin ku sameeyaan jiilka dhalinyarada ah ee ay maskaxda xagjirnimada ku abuureen Al-Shabaab. Waxaa loo baahan yahay istaraatiijiyad hufan oo dib dadkaasi maskaxdooda looga tirtirayo fikradaha xagjirnimada, taas oo taageero ka haysata odayaasha qabiilka, aqoonyahanada, qalabka warbaahinta iyo wadaadada qunyar socodka ee ku nool dalka iyo dibedda intaba. Dowladda Sheikh Shariif waxay bilaabeysaa inay fahamto arintan. Madaxweyne Shariif waxaa uu ka qeybgaley kulan gaar ah oo ku saabsan Islaamka iyo mushkiladda Somalia oo lagu qabtey magaalada Dooxa ee dalka Qadar, dhamaadkii bishii March 2010, halkaas oo aragtidiisa ku aadan Islaamnimada qunyar socodka ee dalka lagu ansixiyey. Taageeradaasi sare ee heerka caalamiga ah ee ay fidiyeen aqoonyahanno Islaam ah oo sumcad leh waxay fure u tahay olole kasta oo la doonayo in shacabka maskaxdooda looga saari fikradaha xagjirnimada. Hase yeeshee, waxa ugu muhiimsan, waxa weeyaan

[90] Mid ka mid ah istaraatiijiyadaha muhiimka ah waxa weeyaan in Sheikh Shariif uu duubo khudbad 15 daqiiqadood oo loogu talagaley maalinta Jimcaha, kaas oo laga baahiyo raadiyaha dowladda ay maamusho, Radio Muqdisho.

talaabooyinka la doonayo in diiradda lagu saaro masaajidada gudaha dalka ku yaala iyo beelaha.

Al-Shabaab waxay aad ugu wanaagsan tahay isticmaalka fadhiyada masaajidada ee wax lagu barto (x*alaqa*), kuwaas oo badanaaba la qabto xiliyada u dhexeeya salaadaha - si ay fikradaha xagjirnimada ugu abuuraan dadka isla markaana ay u qortaan dagaalyahano. Dowlada Federalka KMG iyo taageerayaasheeda Muslimiinta qunyar socodka ah waxaa la gudboon inay isticmaalaan habab kuwaa la mid ah si ay wax ugu sheegaan amaba u hantaan kalsoonida dhalinyarada ku cibaadeysta masaajidada.

Odayaasha qabiilka waxaa loo baahan yahay in loo diyaariyo hawshan lagu tirtirayo fikradaha xagjirnimada. Iyagoo inta badan ah kuwo taxaddar badan, aragti waxqabad leh iyo weliba mowqif muxaafidnimo oo ay leeyihiin, odayaashu waxay u janjeeraan dhanka siyaasadda iyo qunyar socod dhinaca diinta, sidaa darteed waxay noqon karaan kuwo isbaheysi la sameysan kara Dowlada Federalka KMG. Tusaale waxaa ah Xasan Xaad, oo ah hoggaamiye dhaqameed caan ah oo ka soo jeeda beesha Hawiye oo ku nool Muqdisho, kaas oo bilihii dhowaa si weyn uga soo horjeedey Al-Shabaab, hadalo ka dhan ahna jeedinayey. Marka xaalada haatan lagu jiraa loo fiiriyo, talaabadan oo kale waa mid khatar ah. Si kastaba ha ahaatee, ma jiraan wax waxyeeleyn kara saameynta Al-Shabaab iyo sumcadeeda marka loo eego dhaleeceyn kaga timaada beelaha waaweyn ee miisaanka ku leh siyaasadda Somalia. In wadahadal amaba xiriir lala yeeshaa xubno sidaa muhiim ah waa arin lagama maarmaan ah oo la doonayo inay Dowladda Federalka KMG ah ku guuleysato.

## V. SIYAASADDA ARAGTIDA GAABAN EE BEESHA CAALAMKA

Mushkiladda ka aloosan Somalia waxay si tartiib tartiib ah meesha sare ka gaartey agendayaasha caalamiga ee muhiimka ah, laga soo bilaabo sannadkii 2008, iyadoo taa ay ugu wacneyd walaaca laga qabey burcad badeednimada iyo sida loola tacaalayo kooxaha mayalka adag ee ku hanjabaya in jihaadka ay wadaan ay ka dhigi doonaan mid caalami ah. KooxdaAl-Shabaab waxay fikradaha xagjirnimada ku beereysaa Soomaali badan oo ku nool dalalka dibedda, waxay qoraneysaa dhalinyaro jihaad doon ah iyo weliba lacago ay u uruurineyso hawlgaladeeda. Tani waxay walaac iyo taxadar gelisey dalal badan, oo u arka kooxdan inay tahay mid khatar ku ah nabadgelyadooda qaran.[91] Jawaabta degdegga ah ee dalal badan oo Geeska Afrika iyo meelo fog ku yaalaba ay ka bixiyeen waxaa uu noqdey inay taageero milateri fidiyaan isla markaana ay dardar geliyaan dadaalka la doonayo in lagu xakameeyo ama lagu burburiyo shabakadaha caalamiga ee taageera Al-Shabaab. Iyadoo talaabadani ay gacan ka geysan karto dagaalka Dowladda Federalka KMG ay kula jirto mucaaradka, ayaa hadana waxaa loo baahan yahay in la sameeyo dadaal dheeri ah oo lagula dagaalamayo khatarta ka iman karta Islaamiyiinta xagjirka ah.

Tan iyo masiibadii laga dhaxley faragelintii milateri ee Ethiopia, beesha caalamka waxay isku waafaqeen baahida loo qabo inay mideeyaan siyaasadooda dhinaca amaanka, dib u heshiisiinta iyo maamulka dowliga. Ilaa iyo haatan, gargaarka ayaa waxaa laga dhigey mid muhiim u ah iskudayga la doonayo in lagu xoojiyo awoodda dowladda isla mar ahaantaana la siiyo waqti ay ku soo bandhigi karto kartideeda inay si wanaagsan dalka u maamuli karto. Horumar dhinacaa laga gaaraana waxay ahayd mid gaabis ah. Dowladda Federalka KMG waxay haatan leedahay ciidamo faraabadan oo tababaran, laakiin taa laf ahaanteeda weli loogama faaideysan in lagu gaaro guulo dhinaca milateriga ah. Dadaalada dhinaca dib u heshiisiinta ayaa iyana wiiqmey. Walow Dowladda Federalka KMG ee Somalia aysan haysan dhul ay ka taliso, ma cadda waxa beesha caalamka ay sameyn karto si ay u taageerto maamulka Dowladda KMG.[92]

Siyaasadda dhinaca amniga waxaa lagu go'aamiyey in ciidan nabad ilaalin ah oo gaaraya 8,000 oo ka socda Midowga Afrika (AU) loo diro Somalia, isla markaana la tababaro ciidamo cusub oo ay leedahay Dowladda KMG ee Somalia. Hawlgalka nabad ilaalinta ee Midowga Afrika AMISOM waxaa loo arkayey mid muhiim ah oo u sahlayey ciidamada Ethiopia inay isaga soo baxaan Somalia, isla markaana dowladda Somalia la siiyo waqti ay ku soo dhisto ciidamadeeda qaran. Istaraatijiyadan waxaa ka hor yimid caqabado badan, ilaa iyo haatana si dhameystiran looma fulin. In kabadan Saddex sanno kadib, 6,300 oo askari oo keliya oo ka socda AMISOM (oo ka kala yimid Uganda, Burundi iyo Djibouti), ayaa la geeyey.[93] Xooggan caalamiga waxa uu door weyn ka

[91] Sannadkii 2009, Lord Malloch-Brown, oo markaa ahaa wasiirka arrimaha Afrika ee Britain, ayaa sheegey in Somalia ay khatar ka badan tan Afghanistan kaga imaaneysa ku tahay Britain. Jon Swain iyo Michael Gillard, "Is Somalia the new Afghanistan?" [Somalia ma Afghanistanta cusub baa?], *Sunday Times* (London), 9 August 2009.

[92] Beesha caalamka waxay taageero meel dhexaad ah siisaa madaxtooyada Somalia iyo hay'adaha kale ee ku meel gaarka ah, laakiin waxba kama qaban karto inay adkeyso awoodda dhanka maamulka ee dowlad aan ka talin dhul weyn.

[93] Nigeria, Malawi iyo Ghana waxay ugu dambeyntii balanqaadeen inay ciidamo u dirayaan Somalia, laakiin sababo kala duwan awgood ay dib u dhigeen waqtigii ay ciidamo diri lahaayeen. Bishii June 2009, Nigeria Waxay mar kale balanqaadey inay 800 oo ciidamo nabadda suga ah u dirto Somalia. "Nigeriaoo

cayaarey difaaca dowladda KMG, gaar ahaan weerarkii balaarnaa ee xoogaga Islaamiyiinta qaadeen bishii May, 2009. Si kastaba ha ahaatee, ciidamadan xiriirka ay la leeyihiin dowladda, iyo iyagoo la wareegey xilkii ay hayeen ciidamada Ethiopia, waxay horseedey in ciidamadan laga dhigto bar tilmaameed weerarada ay qaadayaan mucaaradka. Haddii aan la helin ciidan tayo leh oo asluubtoodu dhisan tahay oo ka tirsan Dowladda Federalka KMG, ma sahlana in dowladdu ay gacanta ku dhigto dhul isla markaana ay xajisato. Hase yeeshee ciidamo dheeri ah oo ka socda Midowga Afrika waxay dhibaato u horseedi doontaa Dowladda Federalka KMG. Iyadoo talaabada ciidamo kordhinta ay noqon doonto mid la soo dhoweeyo ayaa hadan dhanka kale waxay talaabadaasi xoojin doontaa fikirka ay qabaan Soomaalida ee ah in Dowladda Federalka KMG ay tahay aalad ay ku adeegtaan shisheeyaha.

Dalal dhowr ayaa taageero toos ah u fidiyey ciidamada Dowladda Federalka KMG. Ethiopia waxay tababar u fidisey hubna ay siisey dowladda KMG iyo xoogagga ASWJ. Kenya waxay si qarsoon tababar milateri ugu fidisey 2,500 maleeshiyo si ay u caawiyaan ololaha Dowladda Federalka KMG ee ka dhanka ah kooxda Al-Shabaab, koonfuurta Somalia.[94] Mareykanka waxaa uu bixiyey 40 tan oo hub ah iyo weeraro ay ku qaadey Islaamiyiinta.[95] ishii May 2010, Midowga Yurub waxay bilaabeen inay tababaraan ilaa 2,000 askari oo ka tirsan Dowladda Federalka KMG, tabarkaasi oo ka dhacey Uganda, kadib markii ciidamada Faransiisku ay dhankooda tababar ugu fidiyeen Djibouti 500 oo askari oo dowladda ka tirsan dhamaadkii 2009. Uganda ayaa iyana tababar bixisey.

Hay'adda Horumarinta Barnaamjiyada ee Qaramada Midoobey (UNDP) waxay taageertey dadaalka tababarka loogu fidinayo, mushaharna lagu siinayo ilaa 10,000 oo boolis ah. Iyadoo marka dhan loo fiiriyo ay tababaradan noqon karaan kuwo waxtar leh, ayaa hadana kuwa dhaliilsan waxay ku doodayaan in caqabada ugu weyn ee ku hor gudban Dowladda Federalka KMG ay tahay inay dhisto kalsooni, ciidan laga soo qorey beelaha kala duwan, in si wanaagsan loo qalabeeyo, la dhiirigeliyo, noqdana ciidan si heer qaran ah loo maamulo. Sababo la xiriira musuqmaasuq iyo karti darro awgeed, dowladdu waxay ku guuldareysatey inay mushahar siiso ciidankeeda.[96] Waqtiyadii hore, in badan oo ka mid ah ciidamada Dowladda Federalka KMG iyo boolisku waxay dantu baddey inay iibiyaan hubkooda isla markaana ay u goostaan dhanka mucaaradka.

Dadaalka ku aadan in la aafeeyo shabakadaha caalamiga ah ee taageeraaa Al-Shabaab waxay ku soo biyo shubteen in la xaaraantimeeyo ururka, cunaqabateyn lagu soo rogey shakhsiyaad ka tirsan hoggaamiyeyaasha Islaamiyiinta iyo in la yareeyo taageerada la siiyo mucaaradka Islaamiyiinta. Bishii December 23, 2009, Golaha Amaanka ee Qaramada Midoobey waxaa uu cunaqabateyn ku soo rogey Eritrea, talaabadaas oo

800 askari oo nabadda suga u direysa Somalia", Reuters, 25 June 2009.

[94] Hawlgalkan waxaa uu si xun u dhaawacey xiriirkii aadka u wanaagsanaa ee ka dhexeeyey dowladda Madaxweyne Shariif iyo Kenya. Qorshaha, sida laga soo xiganayo ilo xog ogaal ah, waxaa markii hore fikirkiisa lahaa wasiirkii hore ee gaashaandhigga Muhammad Abdi Gandi iyo Wasiirka Gaashaandhigga Kenya, Muhammad Yusuf Haji, oo ah nin Somali ah isla markaana ay isku beel ka soo wada jeedaan. Ujeeddadu waxay ahayd in la qoro ciidamo u badan beesha Ogaadeen, oo ka kala imaanaya labada dhinac ee Kenya iyo Somalia, isla markaana la geeyo gobollada dooxada Jubba si ay isaga caabiyaan kooxda Al-Shabaab. Hamiga iyo rajada ugu weyn ee laga lahaa qorshaha waxaa uu ahaa in ugu dambeyntii la dhiso maamul goboleed ay leeyihiin beesha Ogaadeen oo laga dhiso gobollada Jubbooyinka, kaas oo la mid noqon doona maamulka ka jira Puntland. Taageerayaasha waxay sheegeen in khilaafka uu u dhexeeyo hoggaamiyeyaal aragti fog leh oo doonaya inay dardar geliyaan nidaamka federalka ee dalku ku dhaqmayo iyo xubno isla Dowladda Federalka KMG ka tirsan oo aan dooneyn in dalka laga tirtiro nidaamka dowladda dhexe. Kenya, waxay ku tilmaameen, inay taageereyso kuwa doonaya in dalka "lakala qoqobo". Kuwa qorshahan dhaliilsan waxay sheegeen in qorshahan uu ahaa istaraatiijiyad si xirfad leh loogu talagaley in lagu hormariyo danaha beesha Ogaadeen. Madaxweyne Shariif waxaa uu dhowaan qaadey talaabo lama filaan ah oo warqad uu soo qorey kaga dalbanayo Madaxweynaha Kenya inuu ciidamada Soomaalida ee lagu tababarey Kenya u gacan geliyo Dowladda Federalka KMG si loogu biiriyo ciidamada caadiga ee dalku leeyahay. Xukuumadda Nairobi si buuxda u ayay u diidey codsigaasi. Wareysiyo ay qaadey hay'adda Crisis Group, Nairobi, January-March 2010. Ethiopia waxay walaac ka muujisey maamul ay Ogaadeenka leeyihiin oo ka hanaqaada koonfuurta Somalia, maamulkaas oo laga yaabo inuu taageero u fidiyo ururka ay isku beesha yihiin ee the Ogaden National Liberation Movement. Eeg fn. 73 kor.

[95] Mareykanka waxaa la sheegayaa inuu taageero dhanka sirdoonka ah u fidiyey ciidamada nabadsugidda ee Dowladda Federalka KMG ah. Jeffrey Gettelman, "U.S. Aiding Somalia in Its Plan to Retake Its Capital" [Mareykanka oo dowladda Somalia caawinaya qorshaheeda dib u qabsashada caasimaddal], *The New York Times*, 5 March 2010. Iyadoo saxaafaddu u muuqatey mid ka badbadineysa heerka uu gaarsiisan yahay taageerada Mareykanka ee dowladda Somalia, Mareykanku waxaa uu sare u qaadey taageerada uu u fidiyo Somalia tan iyo 2009, walow aysan ku faraxsaneyn waxqabadka dowladda, waxaana taa ugu wacan iyadoo dooneysa inaaney dowladdaa dhicin. Si kastaba ha ahaate, siyaasadda Mareykanka ee ku aadan Somalia waxaa weli si weyn u dhaqaajinaya amaba ay salka ugu haysaa walaaca ku saabsan la dagaalanka argagixisada, oo aan sidaa lagama maarmaan u ahayn in lagu meel mariyo dadaal dhanka Dowladda KMG ee Somalia ka imanaya.

[96] Wareysiyo ay qaadey hay'adda Crisis Group, khubaro iyo saraakiil ka tirsan AMISOM, Nairobi, April-May 2010.

jawaab u ah taageerada ay u fidiso mucaaradka ka soo horjeeda Dowladda Federalka KMG.Dowladda Ingiriiska ayaa ku dhawaaqdey bishii March 2010 inay Al-Shabaab ku dareyso liiskeeda ururada argagixisada.[97] Isla bishaa, Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobey Ban Ki-Moon waxaa uu hoggaamiyeyaasha Carabta ugu sheegey dalka Libya in kooxda Al-Shabaab ay khatar ku tahay amaanka caalamka, waxaana uu ku baaqey in la xaaraantimeeyo.

Aragtida shacabka iyo tan dowliga ee dalalka Carabta ee ku aadan ururada Islaamiga ee Somalia ma ahan mid colaadeed marka la barbardhigo dalalka reer Galbeedka. Qaar ka mid ah qalabka warbaahinta ee dalalka Carabta waxay mucaaradka dagaalka wada ugu yeeraan *Al-Muqawamah al-Somaliyah* (Xarakada Wax Iska Caabinta ee Somalia), taa oo ah tilmaan xasaasi ah oo micne balaaran ku leh Bariga Dhexe.[98] Si kastaba ha ahaatee, xaaladdu waa mid aan waxtar sidaa u weyn lahayd marka laga eego heerka dowliga ah, gaar ahaan arrimaha ku saabsan Al-Shabaab. Hadii horey aragtida kooxda laga qabey ay ahayd awood u baabac dhigtey Ethiopia isla markaana u qalmey taageerada Carabta, waxaa kooxdan iyo Islaamnida xagjirnimada ee ay aaminsan tahay ay dowlado badan oo Carbeed u arkaan inay tahay khatar aad u weyn. Dowladaha sida weyn uga walaacsan xaaladan waxaa ka mid ah Sacuudi Caraabiya, Yemen, Masar iyo Suudaan, waayo qeyb ahaan dad badan oo waddamadooda u dhashey ayaa haatan si firfircoon uga barbar dagaalama ciidamada Al-Shabaab.[99]

Xaaraantimeyn ama mamnuucis sharci ah waxaa loo arkaa caqabad , isla markaana horseedi karta burbur ama dhibaato, ugu yaraan muddo gaaban, laakiin ma ahan talaabo si weyn hoos ugu dhigi karta awoodda Al-Shabaab ay ku qoraneyso dagaalyahanno, inay dadka ku abuurto fikrado xagjirnimo iyo lacag uruurin, taana waxaa ugu wacan ururka oo ah mid is bedbedel badan hawlgaladiisuna intooda badan ay sir yihiin. Waxa kale ee aan la hubin waxay tahay, cawaaqibka dhinaca siyaasadda. Waxaa lagu doodaa, in qolyaha mintidka ay soo dhoweynayaan amar mamnuucis ah oo lagu soo rogo, talaabadaas oo ay u qaadanayaan mid ay ku sii xoojinayaan fikirka ah anaga iyo iyaga, iyagoo ku saleynaya diinta. Waxaa xitaa laga yaabaa inay sii adkeyso, caanna ay ka dhigto ajandaha ay wataan ee jihaadka caalamiga ah. Talaabada xaaraantimeynta waxay kaloo adkeyneysaa in wadahadal ama xiriir lala sameeyo xubnaha oggol in la gaaro heshiis siyaasadeed. Marka laga tago cadaadiska diblomaasiyadeed, beesha caalamka wax weyn kama qaban sidii dib u heshiisiinta loo dardargelin lahaa. Hay'adda ugu weyn ee beesha caalamka uga wakiilka ah arrimaha Somalia, Xafiiska Siyaasadda ee Qaramada Midoobey (UN Political Office for Somalia (UNPOS), waxay u muuqatey mid ka cagajiideysa jawaabta ay ka bixiso mucaaradka.

Halhayska mar walba ka soo yeeraa waxaa uu yahay inay garowsan tahay baahida loo qabo in xubnaha aan mintidka ahayn wadahadal lala yeesho, laakiin wax yar ayay ka qabatey sidii ay horkici lahayd amaba ay u fududeyn lahayd hanaankaasi, waxayna taa beddelkeeda diiradda saartaa abaabulka taageerada la siinayo Dowladda Federalka KMG.[100] Talaabada xafiiskan

[97] Australia iyo Canada ayaa iyaguna qorsheynaya inay talaabo taa la mid ah qaadaan. Mareykanka waxaa uu u aqoonsadey inay yihiin Ururo argagixiso sannadkii 2008.

[98] Wargeyska Carbeed maalinlaha ah ee afka dheer ee dhanka bidix u janjeera, kana soo baxa magaalada London *Al Quds al-Arabi*, oo isku arka inuu yahay codka waddada Carbeed , waxaa uu ka mid yahay wargeysyada waaweyn ee caalamiga ee gacanta weyn ka geystey soo shaac bixinta amaba in caan laga dhigo kooxaha mucaaradka Somalia, kuna tilmaanto inay yihiin dhaqdhaqaaaqyo waddani ah oo ka dhiidhinaya shisheeye dhulkooda qabsadey. Al-Shabaab waxay qaadey talaabo xirfadeysan oo ay isu xijineyso dhanka Carabta, inta badanna waxay qaadeysey talaabooyin dheeri ah oo ka badbadin ah si ay sumcadeeda u sii xoojiso. Intii ay joogeen ciidamada Ethiopia gudaha dalka Somalia, wargeysyada Carbeed kuwa liberalka iyo kuwa muxaafadka ah sida *Al-Sharq al-Awsat iyo Al-Hayat* waxay si weyn u adeegsadeen ereyga a*l-muqawamah.* (wax iska caabin). Hase yeeshee qalabka kale ee warbaahinta waxay intooda badan bilaabayaan adeegsiga erey dhexdhexaad ah *al-mu'arada* (mucaaradka), waxaana qalabkaasi warbaahin ka mid ah Televishanka saldhiggiisu yahay dalka Qatari- ee Al-Jazeera.

[99] Si kastaba ha ahaatee, hoos u dhaca taageerada Carabta ee Al-Shabaab, ma ahan mid loo tarjuman karo taageerada ay dowladda KMG u hayaan Carabta oo sare u kacdey. Aragtida laga qabo waa mid weli shaki ama mugdi uu ku jiro, mararka qaar waa mid colaadeed, taana waxaa ugu wacan fikirka ay ka qabaan danaha Ethiopia iyo kuwa reer Galbeedka. Madaxweyne Shariif waxaa uu socdaal balaaran lugta ku mariyey dalalka Bariga Dhexe bishii August 2009 si uu helo kaalmada Carabta, balse waxaa uu dib dalka ugu soo laabtey isagoo niyad jabsan oo xitaa careysan. Kulan uu Qatar ku yeeshey ayaa noqdey mid aad u xumaa, muujiyeyna shakiga weyn ee laga qabo Carabta. Madaxweyne Shariif waxaa loo sheegey in kaalmada maaliyadeed ee Carabta ay shuruud ku xiran tahay, isla markaana laga doonayo inuu wadahadal la yeesho kooxaha mucaaradka isla markaana uu qabto dib u heshiisiin balaaran. Sharif waa uu diidey yabooha lacag la siiyo, waxaana uu sheegey inaanu oggolaan karin in gacmahiisa ay xirnaadaan. Wareysi ay qaadey hay'adda Crisis Group, Nairobi, August 2009.

[100] Ergeyga (hore) ee Qaramada Midoobey ugu qaabilsan arrimaha Somalia, Ahmedou Ould Abdallah, waxaa uu weli diraya fariimo kala duwan oo arintan ku saabsan. Bishii September 2009, waxaa uu BBC u sheegey inuu jeclaan lahaa in wadahadal lala galo kooxaha mucaaradka, ha noqdeen kuwa mintidka amaba yeysan ahaan, isagoo intaa raaciyey in Mareykanku aaney umuurtaa wax diidmo ah ka qabin. Wareysigaasi waxaa si weyn looga baahiyey qalabka warbaahinta ee Somalia, iyadoo dadka faalooyinka bixiya ay ku tilmaameen

Qaramada Midoobey uu had iyo jeer wadahadal kula yeelanayo hoggaamiyaasha bulshada Soomaalida ee ku nool dalalka dibedda, ururada bulshada, ganacsatada iyo hoggaamiyeyaasha beelaha, si kastaba ha loo amaanee, ma ahan kuwo horseedi kara in xasaradda jirta xal loo helo.

Xaqiiqdu waxay tahay in istaraatiijiyadda wadaxaajoodka ee halka dhinac ku kooban si ula kac ah loogu talagaley in laga reebo kooxaha kacdoonka wada, talaabada noocaasi ahna ma ahan mid gacan ka geysan karta in dalka lagu nabadeeyo. Kala qeybsanaanta sii kordheysa ee ka dhex aloosan kooxaha kacdoonka wada tan iyo horaantii 2009 waxay fursado badan siisey xafiiska UNPOS iyo Dowladda Federalka KMG, fursadahaas oo ay wadahadal kula furi kareen xubnaha aan xagjirka ahayn ee ka tirsan kooxahaasi. Iyadoo la raacayo tub toosan oo wadahadal lagula yeelanayo iyo dhaqaale intaba, waxaa laga yaabaa in qaar ka mid ah hoggaamiyeyaasha kooxahan ay dhici kartey in laga dhaadhiciyo, laguna tirtirsiiyo inay aqbalaan in heshiis nabadeed la gaaro. Laakiin fursadaha ugu wanaagsan waxaa laga yaabaa in la wada seegey. Xaaladda colaad loogu muujinayo kooxaha kacdoonka ka wada Somalia ee sii kordheysa waxay micanaheedu noqon kartaa in UNPOS aysan heli doonin xitaa dhaqaale ama talaabo wax soo jiidasho ah oo ay ku qabanqaabiso hanaan noocaasi oo kale ah.

## VI. GABAGABO

Dowladda Federalka KMG ah waa in ay isku daydaa inay ka faaideysato kala qeybsanaanta ka dhex jirta kooxaha Islaamiyiinta, iyadoo wadahadal la yeelaneysa xubnaha kooxaha kale ka tirsan , halka haatan ay ku kooban tahay oo keliya "kooxaha ay isbaheysiga la leedahay ee qunyar socodka ah", sida ASWJ, isla markaana ay ku soo darto xubnaha tiradoodu sii kordheyso ee kooxda Al-Shabaab ka soo goosanaya iyo weliba Islaamiyiinta "waddaniyiinta ah" ee aan ku qanacsaneyn dagaalyahanada shisheeye ee kooxahooda ka tirsan. Talaabadan waxay horseedi kartaa in la helo qaab waddanka looga tirtirayo khatarta dagaalyahanada shisheeye, taas oo noqoneysa talaabo la qaado tii ugu weyneyd una baahan dadaal wadajir ah oo ay sameeyaan guud ahaan Soomaalida, kooxda ay doonaan haka tirsanaadeen, amaba aydolojiyadda ay doonaan ha haysteen. Xaqiiqda marka laga hadlo, hawsha ah in la abuuro isbaheysi sidaa u balaaran waxay noqon kartaa mid si weyn u adag oo in guul laga gaara ay aad u adag tahay. Si kastaba ha ahaatee, waxay tan ku suurageli kartaa iyadoo la helo rabitaan buuxda iyo niyad Soomaalida ka timaada, taageerana ka haysta beesha caalamka oo mowqif mida leh.

Guul ay dagaalyahanada maxaliga ah amaba Soomaalida ka gaaraan inay iska xoreeyaan shisheeyaha waxay horseedi kartaa fursado muhiim ah, isla markaana waxay saameyn ku yeelan kartaa hanaanka nabad raadinta. Marka ugu horeysa, waxaa suuragal ah inay qaadi doonaan talaabooyin ay dib kooxda Al-Shabaab ugu celinayaan aydolojiyadeeda asalka ahaa iyo raadadka waddaniyadda, taasina waxay si tartiib tartiib ah u wiiqi doontaa xubnaha mayalka adag ee ay ka go'an tahay inay Al-Shabaab noqoto koox mar walba ku lamaanan amaba aaminsan fikradaha al-Qaacida. Tan labaad, waxaa suuragal ah in xubnahan ay dadaal u galaan inay isu miisaamaan aragtidooda siyaasadeed iyo tan aydolojiyadda, halka haatan ay ku kooban yihiin oo keliya mabda'a aydolojiyadda. Waxaa markaa kadib soo ifbaxeysa hoggaan wax ka qabta walaaca iyo dhibaatooyinka Soomaalida haysa oo markaa diyaar u ah in la gaaro xal siyaasadeed.

Haddii ay dhacdo in dagaalyahanada amaba jihaad doonka shisheeye ay iska caabiyaan halganka kaga imanaya dagaalyahanada maxaliga amaba Soomaalida, waxaa cawaaqibka tan ay yeelaneysaa ay tahay mid aan u wanaagsaneyn Somalia, gobolka iyo meelo ka sii fog intaba. Barnaamijka kooxda Al-Shabaab ee sida degdegga ah ururka looga dhigayo mid hoos yimaada Al-Qaacida- ee bilihii dhowaa soo muuqanayey, waxaa suuragal ah inuu noqdo mid aan laga hortegi Karin. Marka fikirkan lagu saleeyo, Dowladda Federalka KMG iyo beesha caalamka doorkooda ma noqon karo inay ahaadaan kuwo iska daawada xaaladda iyagoon wax talaabo ah qaadin. Taageero loo fidiyo xubnaha ka soo goostey Al-Shabaab waxay noqon doontaa talaabo muhiim ah. In awood loo yeelo iyadoo la raacayo hab wadaxaajood lagula yeesho, taa oo ay ku jirto dhiirigelin nooc kasta leh, isla markaana loo sameeyo balan qaad ah in lagu sameynayo dhaqan celin siyaasadeed, halka dalalka reer Galbeedkana ay ka bilaabayaan inay

---

inay ahayd is beddel ku yimid mowqifkiisii adkaa ee uu ka taagnaa wadaxaajood la qabto. Danjiraha Mareykanka u fadhiya Kenya, Michael Ranneberger, isna waxaa uu wareysi siiyey isla barnaamijkaa, waxaana uu sheegey in xukuumada Washington ay ka soo horjeeddo wadahadal lala yeesho kooxda Al-Shabaab. Labadaa aragti ee kala duwan waxaa lagu tilmaamey "isku dhac" dhexmarey Qaramada Midoobey iyo Mareykanka. Eeg "Somalia: US and UN disagree on talks with Al-Shabaab" [Somalia: Mareykanka iyo Qaramada Midoobey oo isku khilaafey wadaxaajood lala galo Al-Shabaab], Allafrica.com, 16 September 2009, http://allafrica.com/stories/200909160818.html.

taageeraan hawlahan, ayaa waxaa cad in talaabooyinkan ay noqon doonaan kuwo mira dhal ah.[101]

Cagajiidka beesha caalamka ee ku aadan dhaqangelinta qaab wadaxaajood lagula yeelanayo xubnaha hoggaanka ka tirsan ee garabka Al-Shabaab ee aragtida ku saleysan, waxaa suuragal ah inay hakad geliso talaabada la doonayo in wadahadal lagula yeesho xubnaha "qunyar socodka amaba lagu tilmaamo in fikradaha argagixiso ay ku yar tahay" amaba diidmo mintidnimo ah oo nabadeynta looga soo horjeedo, marka loo eego xaaladda jahwareerka leh ee jirta, ayaa waxay dhalin karaan in si wanaagsan loo fahmi waayo isbedelada ka dhex dhacaya iminka Al-Shabaab. In la derso xaalada isbedelkaasi iyo in fahamka saameynta xun ee ururka, qaab dhismeeska awooddooda iyo hogaankooda, waxaa suuragal ah inay ugu dambeyntii horseeddo in cagajiidka beesha caalamka uu soo afjarmo.

**Nairobi/Brussels, 18 May 2010**

[101] Eeg, tusaale ahaan. Bronwyn E. Bruton, "Somalia: A New Approach" [Somalia: Hanaan Cusub], Council on Foreign Relations, March 2010.

# APPENDIX A

## MAP OF SOMALIA




Map No. 3690 Rev. 7 UNITED NATIONS
January 2007

Department of Peacekeeping Operations
Cartographic Section